DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

SANADKA 26AAD	CADADKA 9AAD	TAARIIKH: 1/9/26	Lam. 05

FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
الجريدة الرسمية

Ansixinta wax–ka–bedelka Sharciga Maamulka Gobolladda, Degmooyinka iyo Dhismaha Dowladaha Hoose ee Dowladda Puntland

TUSMADA	
Qeybta 1aad	*Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah* **Ansixinta wax–ka–bedelka Sharciga Maamulka Gobolladda, Degmooyinka iyo Dhismaha Dowladaha Hoose ee Dowladda Puntland**
Qeybta 2aad	*Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.* *WAXBA MALEH*
Qeybta 3aad	*Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.* *WAXBA MALEH*
Qeybta 4aad	Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha. WAXBA MALEH
Qeybta 5aad	Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda. WAXBA MALEH

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتـب
الـرئيـس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lr. 006 ee 1-da September 2026, kuna saabsan Ansixinta wax-ka-bedelka Sharciga Maamulka Gobolladda Degmooyinka iyo Dhismaha Dowladaha Hoose ee Dowladda Puntland.

Madaxweynaha Dowladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/30/2026, kuna taariikhaysan 4-tii August 2026.

Markuu Tixgeliyey: Baahida loo qabo Ansixinta Sharciga Sharciga Maamulka Gobolladda Degmooyinka iyo Dhismaha Dowladaha Hoose ee Dowladda Puntland.

Wuxuu soo saaray

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Maamulka Gobolladda Degmooyinka iyo Dhismaha Dowladaha Hoose ee Dowladda Puntland.

Qodobka 2aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda.

Qodobka 3aad

Dhaqangalka Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

Siciid Cabdullaahi Deni
Madaxweynaha Dawladda Puntland

Office of the President
Puntland State of Somalia

Tell: +252-090-6809612; E-mail: dg.oop@plstate.so, oop@plstate.so; Website: www.plstate.so

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA

ولاية بو نت لاند الصومال
مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:-XGGW/DPL/30/2026 Garoowe, Isniin, Taariikh: - 04/08/2026

Ku:- Madaxweynaha Dawladda Puntand Garoowe

Ujeeddo:-**Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Maamulka Gobollada, Degmooyinka iyo Dhismaha Dawladaha Hoose Ee Puntland**

Mudane Madaxweyne,

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -

MARKUU ARKAY:- Qodobada **60**-aad **(1), 64**-aad **(1), 68**-aad**(t)** iyo **70**-aad **(1)** ee Dastuurka Dawladda Puntland.

MARKUU ARKAY:- Qodobadda **2**-aad **(1), 3**-aad **(1), 57**-aad**(2)** iyo **58**-aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

MARKUU ARKAY:- Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/138/2026 ee June 21, 2026, kuna saabsan wax-ka-beddelka Xeerka Maamulka Gobollada, Degmooyinka iyo Dhismaha Dawladaha Hoose Puntland.

MARKUU TIX-GELIYEY: - Baahida loo qabo Wax-ka-beddelka Iyo Kaabista Xeerka Maamulka Gobollada, Degmooyinka iyo Dhismaha Dawladda Hoose Puntland.

MARKUU DHEGEYSTEY: - Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 58-aad, Fadhigiisii 13-aad ee 08.07.2026 cod gacanta tag ah ku Ansixiyeen wax-ka-beddelka Xeerka Maamulka Gobollada, Degmooyinka iyo Dhismaha Dawladda Hoose Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa (**38**) Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol (**32**) Mudane, Diidmo (**5**) Mudane, halka uu ka aamusay (**1**) Mudane.

WUXUU GUDDOOMIYEY: -
Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Maamulka Gobollada, Degmooyinka iyo Dhismaha Dawladda Hoose Puntland.

Wada Shaqeyn Wacan

Md. Cabdirisaaq Axmed Siciid
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES



DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

WAX-KA-BEDDELKA XEERKA MAAMULKA GOBOLLADDA, DEGMOOYINKA & DHISMAHA DAWLADAHA HOOSE EE PUNTLAND

Luulyo, 2026

TUSMO

.....1

CUTUBKA 1-aad.....1

QODOBO HORDHAC AH.....1

Qodobka 1-aad.....1

Magaca Xeerka.....1

Qodobka 2-aad.....1

Erey-Bixin.....1

Qodobka 3-aad.....2

Ujeeddada Xeerka.....2

Qodobka 4-aad.....3

Mabaadi'da Xeerka.....3

Qodobka 5-aad.....3

Baaxadda Xeerka.....3

CUTUBKA 2-aad.....3

MAAMULKA GOBOLLADA.....3

Qodobka 6-aad.....3

Qaab-Dhismeedka Dawladda Puntland.....3

Qodobka 7-aad.....3

Gobollada iyo Degmooyinka Puntland.....3

Qodobka 8-aad.....4

Habka Maamulka Gobollada.....4

Qodobka 9-aad.....4

Guddiga Nabadgelyada Gobolka.....4

Qodobka 10-aad.....4

Waajibaadka Guddiga Nabadgelyada Gobolka.....4

Qodobka 11-aad.....5

Shuruudaha Magacaabidda Guddoomiyaha Gobolka iyo.....5

Ku-xigeennadiisa.....5

Qodobka 12-aad.....5

Awoodaha iyo Xilalka Guddoomiyaha Gobolka.....5

Qodobka 13-aad.....6

Awoodaha iyo Xilalka Guddoomiye Ku xigeennada Gobolka.....6

Qodobka 14-aad.....6

Xil-waayidda Guddoomiyaha Gobolka iyo ku xigeennada.....6

Qodobka 15-aad.....6

Guddiga Fulinta Gobolka.....6

Qodobka 16-aad.....6

CUTUBKA 3-aad.....7

DHISIDDA MAAMULKA DAWLADAHA HOOSE.....7

Qodobka 17-aad.....7

Habka Maamulka Dawladaha Hoose.....7

Qodobka 18-aad.....7

Shuruudaha Degmo Lagu Bixin Karo.....7

Qodobka 19-aad.....7

Shuruudaha Degsiimo Lagu aqoonsan karo.....8

Qodobka 20-aad.....8

Shuruudaha Lagu Aqoonsan Karo Tuulo.....8

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 21-aad 8
Darajooyinka Degmooyinka 8
Qodobka 22-aad 8
Soohdimaha Degmooyinka 8

CUTUBKA 4-aad 9

QAAB DHISMEEDKA MAAMULKA DAWLADAHA HOOSE 9
Qodobka 23-aad 9
Doorashada, Xil-haynta iyo Dhaarta Golayaasha Deegaanka 9
Qodobka 24-aad 9
Shuruudaha Doorashada Xubnaha Golaha Deegaanka 9
Qodobka 25-aad 10
Shuruudaha Lagu Lumin Karo Xubinnimada Golaha Deegaanka 10
Qodobka 26-aad 10
Xasaanadda Golaha Deegaanka 10
Qodobka 27-aad 11
Tirada Golayaasha Deegaanka 11
Qodobka 28-aad 11
Qodobka 29-aad 11
Kala-Dirista Golayaasha Deegaanka 11
Qodobka 30-aad 12
Awoodaha Golaha Deegaanka 12
Qodobka 31-aad 13
Qodobka 32-aad 15
Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Golaha Deegaanka/Duqa Degmada 15
Qodobka 33-aad 15
Awoodda iyo Waajibaadka Ku-Xigeenka Gudoomiyaha 15
Golaha Deegaanka 15
Qodobka 34-aad 16
XiI-Waayista Guddoomiyaha Golaha Deegaanka Ahna Duqa Degmada iyo Ku-Xigeenkiisa 16
Qodobka 35-aad 17
Guddiga Horumarinta Degmooyinka 17
Qodobka 36-aad 17
Magacaabidda Guddiga Horumarinta Degmooyinka 17
Qodobka 37-aad 18
Waajibaadka/Shaqada Guddiga Horumarinta Degmada 18
Qodobka 38-aad 18
Guddiga Fulinta ee Degmada 18
Qodobka 39-aad 18
Waajibaadka Guddiga Fulinta 18
Qodobka 40-aad 19
Guddiga Xallinta Khilaafaadka Dhulka 19
Qodobka 41-aad 20
Waajibaadka Guddiga Xallinta khilaafaadka Dhulka 20
Qodobka 42-aad 20
Shuruudaha Lagu Xulanayo Xoghayaha Dawladda Hoose 20
Qodobka 43-aad 20
Magacaabista Xoghayaha Dawladda Hoose 20
Qodobka 44-aad 20
Xil waayidda Xoghayaha Dawladda Hoose 20
Qodobka 45-aad 21
Xilka iyo Waajibaadka Xoghayaha Dawladda Hoose 21
Qodobka 46-aad 22
Guddiga Joogtada Ah 22
Qodobka 47-aad 22
Waajibaadka Guddiga Joogtada ah 22

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 48-aad 22
Kulamada iyo Go'aamada Guddiga Joogtada ah 22
Qodobka 49-aad 23
Guddiga Maamulka Xaafadaha 23
Qodobka 50-aad 23
Maamulka Degsiimada iyo Guddiyada Tuulooyinka 23
Qodobka 51-aad 24
Awoodaha Guddiga Maamulka Degsiimada iyo Tuulada 24
Qodobka 52-aad 24
Shirarka Golaha Deegaanka 24
Qodobka 53-aad 25
Ansaxa Shirarka Golaha Deegaanka 25
Qodobka 54-aad 25
Hadal-Qoraalka iyo Diiwaan-gelinta 25
Qodobka 55-aad 26
Gunnooyinka Golayaasha Deegaanka 26
Qodobka 56-aad 26
Guddiga Nabadgelyada Degmada 26
Qodobka 57-aad 26
Xilka iyo Waajibaadka Guddiga Nabadgelyada 26

CUTUBKA 5-aad 27

AWOODAHA MAAMUL IYO XEER-DEJIN EE DAWLADAHA HOOSE 27
Qodobka 58-aad 27
Waaxyaha Dawladaha Hoose 27
Qodobka 59-aad 27
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Qorshaynta 27
Qodobka 60-aad 27
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira 27
Bixinta Adeegyada Bulshada 27
Qodobka 61-aad 28
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira 28
Nadaafadda iyo Fayo-dhowrka 28
Qodobka 62-aad 28
Awoodaha Dawladaha Hoose ee La Xiriira 28
Maamulka Hawlaha Guud 28
Qodobka 63-aad 29
Awoodaha Dawladaha Hoose ee La Xiriira Shaqaalaha 29
Qodobka 64-aad 29
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira 29
Diiwaan-Gelinta Dadka 29
Qodobka 65-aad 30
Awoodaha Dawladaha Hoose ee La Xiriira 30
Iibka iyo Qandaraasyada 30
Qodobka 66-aad 30
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Xeer-Dejinta 30
Qodobka 67-aad 31
Awoodaha Dawladaha Hoose ee La Xiriira Heshiis Gelidda 31
Qodobka 68-aad 31
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Ilaalinta Deegaanka 31
Qodobka 69-aad 31
Awoodaha Dawladaha Hoose ee La Xiriira Ilaalinta Diinta iyo Dhaqanka Suubban 31
Qodobka 70-aad 32
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Horumarinta Xoolaha, Kalluunaysiga iyo Beeraha 32
Qodobka 71-aad 32

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Horumarinta Suugaanta, Hiddaha/dhaqanka suubban iyo Ciyaaraha 32
Qodobka 72-aad 32
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Horumarinta Ganacsiga 32
Qodobka 73-aad 33
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Canshuuraha iyo Ururinta Dakhliga 33
Qodobka 74-aad 33
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Dab-Damiska 33

CUTUBKA 6-aad 33

XIRIIRKA U DHEXEEYA DAWLADDA IYO DAWLADAHA HOOSE 33
Qodobka 75-aad 33
Xiriirka Wasaaradda iyo Dawladaha Hoose 33
Qodobka 76-aad 34
Kaalinta Wasaaradaha La Shaqeeya Dawladaha Hoose 34

CUTUBKA 7-aad 34

XISAABAADKA, DABAGALKA IYO MIISAANIYADDA 34
Qodobka 77-aad 34
Habka Xisaabaadka 34
Qodobka 78-aad 35
Mas'uuliyadda Xisaabaadka 35
Qodobka 79aad 35
Dabagalka iyo Baarista Xisaabaadka 35
Qodobka 80-aad 36
Miisaaniyadda 36
Qodobka 81-aad 37
Kormeerka iyo Baarista Miisaaniyadda 37

CUTUBKA 8-aad 37

ILAHA DAKHLIGA IYO KHARASHKA 37

Qodobka 82-aad 37

Canshuuraha 37
Qodobka 83-aad 37
Macaashka Ganacsiga iyo Kirooyinka 37
Qodobka 84-aad 38
Amaahda 38
Qodobka 85-aad 38
Deeqaha iyo Kabista Dhaqaale ee Dowladda Dhexe 38
Qodobka 86-aad 38
Ururinta Dakhliga 38
Qodobka 87-aad 39
Kharashka 39

CUTUBKA 9-aad 39

DEMBIYADA IYO RACFAANKA 39
Qodobka 88-aad 39
Ciqaabaha 39
Qodobka 89-aad 40
Racfaanka 40

CUTUBKA 10-aad 40

QODOBO GUUD 40
Qodobka 90-aad 40
Maaraynta hantida 40

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 91-aad 40
Soo Saarista Xeer Nidaamiyeyaal 40
Qodobka 92-aad 40
Burin 40
Qodobka 93-aad 41
Dhaqan-galka Xeerka 41

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

CUTUBKA 1-aad
QODOBO HORDHAC AH

Qodobka 1-aad
Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Maamulka Gobollada, Degmooyinka iyo Dhismaha Dawladaha Hoose ee Dawladda Puntland.

Qodobka 2-aad
Erey-Bixin

Xeerkan gudihiisa haddii aan si kale loo fasirin, ereyada soo socda waxaa micnahoodu noqonayaa sidan:-

No	Erayga	Macnaha
1.	Dawlad	Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed.
2.	Dastuur	Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed.
3.	Xeer	Waxaa loola jeedaa Xeerka Maamulka Gobollada, Degmooyinka iyo dhismaha Golayaasha Dawladaha Hoose ee Dawladda Puntland.
4.	Garsoor	Waxaa loola jeedaa Maxkamadaha iyo Xeer-Ilaalinta Puntland, sida ku xusan Dastuurka Dawladda Puntland.
5.	Wasaarad	Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta Dawladda Puntland.
6.	Wasiir	Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta Dawladda Puntland.
7.	Xeerka Ciqaabta Guud	Waxaa loola jeedaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (Xeer Lr. 5 ee 1962).
8.	Gobol	Waxaa loola jeedaa Gobollada Puntland ay u qaybsan tahay.
9.	Degmo	Waxaa loola jeedaa deegaan ka kooban xaafado, degsiimooyin iyo tuulooyin, haystana aqoonsiga Wasaaradda Arrimaha Guddiga, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta.
10.	Degsiimo	Waxaa loola jeedaa deegaan ka weyn tuulo, lehna adeegyada aasaasiga ah ayna aqoonsan tahay Degmada ay hoostagto.
11.	Tuulo	Waxaa loola jeedaa deegaan ka yar degsiimo.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

12.	Guddoomiye Gobol	Waxaa loo la jeedaa mas'uulka ugu sareeya Gobolka kana wakiil ah Dawladda Dhexe.
13.	Guddoomiye Degmo	Waxaa loola jeedaa Xubinta Golaha Deegaanka ee Degmo iska dhex doorteen inuu noqdo Guddoomiyaha Degmada iyo kan Golaha Deegaanka.
14.	Xubin Gole Deegaan	Waxaa loola jeedaa Xubnaha Dadweynuhu si toos ah ugu doorteen hoggaaminta Maamulka Degmada.
15.	Soohdin	Waxaa loola jeedaa soohdimaha u dhexeeya Degmooyinka Puntland ee kala xadeeya Maamulka hoos yimaada Degmooyinka.
16.	Xoghayaha D/Hoose	Waxaa loola jeedaa sarkaalka ugu sarreeya hawl-wadeennada maamulka ee Dawladda Hoose.
17.	Taliye	Waxaa loola jeedaa Taliyaha Ciidanka Booliska ee heer Degmo.
18.	Darajooyinka	Waxaa loola jeedaa maqaamka degmo loo qoondeeyay markii la qiimeeyey, wax-soo-saarka dhaqaale, tirada dadweynaha iyo baaxadeeda dhuleed.

Qodobka 3-aad
Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka Xeerkani waa; -

1. In la dhiso nidaam maamul oo hufan, isla xisaabtan leh, kana shaqeeya horumarinta adeegyada bulshada.
2. In lagu maamulo Gobollada, Degmooyinka iyo Dhismaha Golayaasha Deegaanka Dawladaha Hoose ee Dawladda Puntland.
3. In la dejiyo nidaam lagu kala xadaynayo soohdimaha degmooyinka, degsiimooyinka iyo tuulooyinka, si loo xaqiijiyo hufnaanta maamulka, loogana hortago isku dhacyada xuduudaha.
4. In la xoojiyo maamul-daadejinta iyo awood-siinta dawladaha hoose si ay u gutaan waajibaadkooda.
5. In la horumariyo ka qaybgalka bulshada, isla markaana la xaqiijiyo caddaaladda, hufnaanta iyo maamul wanaagga.
6. Kala xadaynta awoodaha maamul iyo cashuureed ee heerarka Hay'adaha Dawladda.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 4-aad
Mabaadi'da Xeerka

Mabaadi'da hagaysa ku-dhaqanka iyo fulinta Xeerkan waa:

1. U hoggaansanaanta Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Xeerarka kale ee Puntland.
2. Daahfurnaanta, isla-xisaabtanka iyo maamul-daadejinta.
3. Sinnaanta iyo caddaaladda adeeg-bixinta bulshada.
4. Wada-shaqaynta iyo isku-duwidda hay'adaha ay khusayso.

Qodobka 5-aad
Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu maamulayaa dhammaan Gobollada, Degmooyinka, Dawladaha Hoose iyo Golayaasha Deegaanka ee Dawladda Puntland.

CUTUBKA 2-aad
MAAMULKA GOBOLLADA

Qodobka 6-aad
Qaab-Dhismeedka Dawladda Puntland

1. Dawladda Puntland waxay ka kooban tahay Gobollo iyo Degmoooyin.
2. Caasumadda Dawladda Puntland waa magaalada Garoowe,waxayna leedahay Xeer u gaar ah.

Qodobka 7-aad
Gobollada iyo Degmooyinka Puntland

1. Dawladda Puntland waxay ka kooban tahay Sagaal (9) Gobol, oo kala ah; Nugaal, Bari, Sool, Sanaag, Mudug, Haylaan, Karkaar, Cayn iyo Raas-casayr.
2. Gobol kasta wuxuu u qaybsamaa Degmooyin, Degsiimooyin iyo Tuulooyin.
3. Darajooyinka Degmooyinku waxay kala yihiin; darajada 1-aad, darajada 2-aad iyo darajada 3-aad.
4. Magaalo madaxda gobol kasta waa Darajada 1-aad waana kuwa soo socda:-

Tiro	Gobolka	Magaca Magaalo-Madaxda	Darajada Degmada
1.	Gobolka Nugaal	Garoowe	1-aad
2.	Gobolka Bari	Boosaaso	1-aad
3.	Gobolka Sool	Laas-caanood	1-aad
4.	Gobolka Sanaag	Badhan	1-aad
5.	Gobolka Mudug	Gaalkacayo	1-aad
6.	Gobolka Haylaan	Dhahar	1-aad

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

7.	Goboka Karkaar	Qardho	1-aad
8.	Gobolka Cayn	Buuhoodle	1-aad
9.	Gobolka Raascasayr	Caluula	1-aad

Qodobka 8-aad
Habka Maamulka Gobollada

1. Dawladda Puntland waxay ku dhaqmaysaa Mabaadi'da Hannaanka Baahinta Maamulka.
2. Xukuumadda ayaa mas'uul ka ah dib-u-habaynta iyo kala xadeynta gobollada iyo degmooyinka sida ku cad Dastuurka Dawladda Puntland, waxaana la raacayaa hab-raaca ku xusan qodobka 22-aad ee xeerkan.
3. Si Xeerkan loo dhaqangeliyo waxaa muhiim ah in la caddeeyo Soohdimaha degmooyinka.
4. Maamulka gobolku wuxuu hoos yimaadaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta ee Dawladda Puntland.

Qodobka 9-aad
Guddiga Nabadgelyada Gobolka

1. Gobol kasta wuxuu yeelanayaa Guddiga Nabadgelyada oo ka kooban; -
   b. Guddoomiyaha Gobolka (Guddoomiyaha Guddiga)
   t. Guddoomiyaha Degmada.
   j. Taliyaha Qeybta Booliska Gobolka
   x. Taliyaha Xabsiga Gobolka
   kh. Taliyaha Sirdoonka ee Gobolka.
2. Guddiga Nabadgelyada Gobolku waxay kaashan karaan hay'adaha/laamaha kale ee Dawladda, si ay uga wada shaqeeyaan arrimaha nabadgelyada Gobolka.

Qodobka 10-aad
Waajibaadka Guddiga Nabadgelyada Gobolka

Guddiga Nabadgelyada Gobolku; -

1. Wuxuu ilaaliyaa xasiloonida Gobolka.
2. Wuxuu ka hortagaa denbiyada abaabulan ee ka dhici kara Gobolka.
3. Wuxuu go'aamadiisa u soo gudbiyaa Wasaaradaha Amniga iyo DDR-ta, iyadoo mar kasta ogaysiin la siinayo Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta ee Dawladda Puntland.
4. Wuxuu wacyigeliyaa, iskuna xiraa bulshada.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 11-aad
Shuruudaha Magacaabidda Guddoomiyaha Gobolka iyo Ku-xigeennadiisa

1. Madaxweynaha Dawladda Puntland ayaa digreeto ku magacaabaya Guddoomiyaha Gobolka iyo ku xigeenadiisa, kadib talo soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda.
2. Qofka noqonaya Guddoomiyaha Gobolka iyo Ku-xigeennadiisa waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda: -

b. Waa inuu yahay muwaaddin Puntlander ah, Muslim ah, gutana waajibaadka Diiniga ah.
t. Waa in aan da'diisu ka yarayn soddon (30) sano.
j. Waa in aan xuquuqdiisa muwaaddinnimo la laalin shantii (5) sano ee ugu dambaysay.
x. Waa in uu leeyahay aqoon sare iyo waayo-aragnimo maamul.
kh. Waa inuu xog-ogaal u yahay duruufaha iyo dhibaatooyinka Gobolka.
d. Waa inuusan isticmaalin wax maan-dooriye ah.

Qodobka 12-aad
Awoodaha iyo Xilalka Guddoomiyaha Gobolka

1. Guddoomiyaha Gobolku waa madaxa u sarreeya laamaha Dawladda ee heer Gobol, wuxuuna guddoomiyaa shirarka Guddiyada Nabadgelyada iyo Fulinta ee Gobolka.
2. Wuxuu mas'uul ka yahay arrimaha siyaasadda iyo nabadgelyada Dawladda ee heer Gobol.
3. Wuxuu warbixin bille ah ama hadba wakhtiga ku habboon oo shaqadiisa ku saabsan u gudbiyaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Madaxweynaha Dawladda Puntland.
4. Wuxuu qabtaa waajibaad kasta oo kale oo uu u xilsaaro Madaxweynaha Dawladda Puntland ama Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo aan ka hor imaanayn xeerkan.
5. Wuxuu gacan ka geystaa xallinta khilaafaadka ka dhaca gudaha Gobolka, si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee Puntland.
6. Wuxuu magacaabaa Guddiga Xallinta Khilaafaadka ee heer Gobol hadba sida ku habboon xaaladda khilaaf ee markaas taagan.
7. Wuxuu guddoomiyaa kulamada ay isugu yimaadaan guddiyada joogtada ah ee Golayaasha Degmooyinka Gobolka.
8. Wuxuu kormeeraa adeegyada iyo hawl-gallada xukuumadda ee Gobolka.
9. Wuxuu kormeeraa mashaariicda iyo hawlaha shaqo ee ka socda Gobolka.
10. Wuxuu guddoomiyaa kulamada ay isugu yimaadaan Isu-duwayaasha Wasaaradaha ee Gobolka.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 13-aad
Awoodaha iyo Xilalka Guddoomiye Ku xigeennada Gobolka

1. Guddoomiye ku-xigeenku waa mas'uulka labaad ee Gobolka.
2. Guddoomiye ku-xigeenku wuxuu qabtaa xilalka guddoomiyaha Gobolka marka uu maqanyahay ama si ku meel-gaar ah uusan xilkiisa u gudan karin.
3. Wuxuu guddoomiyaha kala taliyaa shaqada Gobolka guud ahaan.
4. Wuxuu fuliyaa hawlaha Guddoomiyuhu u-xil-saaro oo aan ka baxsanayn awoodda iyo xilka Guddoomiyaha.

Qodobka 14-aad
Xil-waayidda Guddoomiyaha Gobolka iyo ku xigeennada

Guddoomiyaha Gobolka iyo ku-xigeennadiisa waxay xilka ku waayi karaan sababaha soo socda. -

1. Geeri ama jirro ku timaadda oo uu la gudan waayo xilka.
2. Is casilaad qoraal ah.
3. Xil gudasho la'aan.
4. Xil-ka qaadis.

Qodobka 15-aad
Guddiga Fulinta Gobolka

Guddiga fulinta Gobolku wuxuu ka kooban yahay:

b. Guddoomiyaha Gobolka.

t. Ku-xigeennadiisa.

j. Iyo Isu-duweyaasha Wasaaradaha ee heer Gobol.

Qodobka 16-aad
Xilka iyo Waajibaadka Isu-duwaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Gobolka

Isu-duwaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta ee Gobolku wuxuu;

1. Isu-duwaa warbixinnada Dawladaha hoose ee Gobolku ka kooban yahay, warbixinna ka siiyaa Guddoomiyaha Gobolka.
2. Mas'uul ka yahay isu-duwidda Miisaaniyadda dawladaha Hoose ee Gobolka, wuxuu u gudbiyaa Wasaaradda isagoo raacinaya warbixin faah-faahsan.
3. Ururiyaa xisaab-xirada dawladaha Hoose ee gobolkiisa, wuxuna u soo gudbiyaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
4. Kaydiyaa dukumentiyada Gobolka iyo galalka shaqaalaha dawladaha Hoose ee Degmooyinka Gobolka.
5. Qabtaa shaqo kasta oo ay u igmadaan Wasiirka Wasaaradda iyo Guddoomiyaha Gobolka.
6. Waa sarkaalka Saddexaad ee Maamulka Gobolka.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

CUTUBKA 3-aad
DHISIDDA MAAMULKA DAWLADAHA HOOSE

Qodobka 17-aad
Habka Maamulka Dawladaha Hoose

1. Dawladaha Hoose waa heerka 2-aad ee Dawladda Puntland siyaasad ahaan, Dawladaha Hoose waxay hoos tagaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
2. Maamulka Dawladaha Hoose wuxuu ku dhisan yahay mabaadi'da hannaanka maamul baahinta sida ku cad Dastuurka Dawladda Puntland.
3. Maamulka degmadu wuxuu ka kooban yahay; -
   b. Degmo.
   t. Degsiimo.
   j. Tuulo.
4. Maamulka degmadu waa Hay'ad dawladeed oo loo aasaasay horumarinta degmooyinka, waxayna leeyihiin jiritaan qaanuuni ah iyo maamul madax bannaan oo ay ku fuliso waajibaadkeeda, si waafaqsan xeerkan iyo shuruucda kale ee dalka.

Qodobka 18-aad
Shuruudaha Degmo Lagu Bixin Karo

1. Waa in Degmada cusub ay u jirtaa Degmada kale masaafo aan ka yarayn lixdan kiilo mitir (60 km).
2. Waa in tirada dadweynaha Degmadu aanay ka yarayn afar kun iyo shan boqol (4,500) oo qoys.
3. Waa in degmadu dabooli kartaa baahideeda dhaqaale.
4. Waa inay hoos tagi karaan ugu yaraan labo (2) degsiimo iyo Shan (5) tuulo.
5. Waa inay leedahay Jidad, Huteelo, isgaarsiin, xarun Boolis, Maxkamad, adeegyada asaasiga ah sida xarun caafimaad iyo Dugsi hoose/dhexe.
6. Degmo, degsiimo ama tuulo aan loo marin hab aan waafaqsanayn xeerkan lama samayn karo.
7. Deegaamaynta cusub waa in oggolaansho looga helo Wasaaradda.

Qodobka 19-aad
Shuruudaha Degsiimo Lagu aqoonsan karo

1. Waa in degsiimadu ay u jirtaa degmada masaafo aan ka yarayn soddon kiilo mitir (30 km).
2. Waa in tirada dadweynaha degsiimadu aanay ka yarayn kun (1,000) qoys.
3. Waa inay degsiimadu leedahay ilo dhaqaale oo ay baahiyaheeda maamul iyo hormarineed ku dabooli karto.
4. Waa inay leedahay adeegyada asaasiga ah qaarkood sida xarun caafimaad iyo Dugsi hoose/dhexe.

GARYAQAANKA GUUD OF DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 20-aad
Shuruudaha Lagu Aqoonsan Karo Tuulo

1. Waa in tuuladu ay u jirtaa Degmada masaafo aan ka yarayn toban kiilo mitir (10 km).
2. Waa in dadweynaha tuulada aanay ka yarayn shan boqol (500) oo qoys.
3. Waa inay leedahay adeegyada asaasiga ah qaarkood sida Rug caafimaad iyo goobo waxbarasho.

Qodobka 21-aad
Darajooyinka Degmooyinka

1. Degmooyinka Puntland waxay u kala baxaan darajada 1-aad, 2-aad iyo 3-aad.
2. Haddii Degmo loo aqoonsado in ay la timid horumar xagga dhaqaalaha ama bulshada la xiriira, waxay Wasaaraddu talo ku soo jeedinaysaa in wax laga bedelo darajadeeda, kadib markii Golaha Xukuumaddu soo oggolaadaan, waxaana ansixinaya isbedelkaas Golaha Wakiillada.
3. Haddii Degmo hoos uga dhacdo shuruudihii markii hore darajada lagu siiyey, waxay Wasaaraddu iyadoo daraasad ku salaynaysa ay talo ku soo jeedinaysaa in darajo ahaan degmadaas hoos loo dhigo, kadib markii Golaha Xukuumaddu soo oggolaado waxaa laga ansixinayaa Golaha Wakiillada.
4. Darajooyinka degmooyinka waxaa lagu salaynayaa saddex qodob: -
   b. Baaxadda dhuleed ee degmada.
   t. Awoodda wax-soo-saar iyo dhaqaale ee degmada.
   j. Tirada dadka ku nool ee rasmiga ah oo lagu sameeyey tirakoob sugan.
5. Waxaa mamnuuc ah in si ku meel gaar ah ama siyaasadeysan loo beddelo soohdimaha degmo, iyadoo aan loo marin hab waafaqsan Xeerka.

Qodobka 22-aad
Soohdimaha Degmooyinka

1. Degmooyinkii horay u jiray ee aysan saamayn xuduudaheeda magacaabidda degmooyinka cusubi waxay lahaanayaan xuduudahoodii, magaalo madaxyadoodii iyo magacoodii.
2. Xuduudaha gobollada iyo degmooyinka cusub iyo kuwa ay ka farcameen waxaa lagu soo saarayaa wareegto Madaxweyne, iyadoo la tixgelinayo talada Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee ku dhisan daraasad iyo hab-raacyo cadcad, ka dibna waxaa laga ansixinayaa Golaha Wakiillada.
3. Go'aaminta, dib-u-eegista ama kala xadaynta soohdimaha degmooyinka waxaa fulinaysa Wasaaradda, iyadoo raacaysa tilmaamaha ku xusan Dastuurka Puntland iyo xeerkan.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

CUTUBKA 4-aad
QAAB DHISMEEDKA MAAMULKA DAWLADAHA HOOSE

Qodobka 23-aad
Doorashada, Xil-haynta iyo Dhaarta Golayaasha Deegaanka

1. Golayaasha Deegaanka waxaa dooranaya muwaadiniinta Degmo kasta, si waafaqsan Dastuurka Dawladda Puntland iyo Xeerarka Doorashooyinka.
2. Muddada xil-haynta Goluhu waa Shan (5) sano oo ka bilaabanaysa maalinta natiijada doorashada lagu dhawaaqo, dibna waa loo soo dooran karaa.
3. Doorashooyinka Dawladaha Hoose ee Puntland waa in ay dhacaan hal mar, haddiise sababo ka baxsan awoodda Dawladda ay kallifaan in doorashooyinka degmooyinku kala dambeeyaan, waxaa is waafajintooda ka tashanaya, go'aanna ka gaaraya wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Guddiga Doorashooyinka Puntland.
4. Xubnaha Golaha Deegaanka ee la soo doortay waxay marayaan dhaarta Dastuuriga ah.

Qodobka 24-aad
Shuruudaha Doorashada Xubnaha Golaha Deegaanka

1. Qofka loo dooranayo xubin Golaha Deegaanka ee Degmo, waa: -
   b. Inuu yahay Muslim garaadkiisu dhan yahay oo xilkas ah.
   t. Inuu yahay Muwaadin puntalnder ah.
   j. In aysan da'diisu ka yarayn 25 sano.
   x. Inuu leeyahay ugu yaraan aqoon dugsi dhexe ama wax u dhigma.
   kh. Inuu leeyahay waayo-aragnimo maamul oo aan ka yarayn 2-sano.
   d.In aanu ahayn Shaqaale Dawladeed, kana tirsanayn ciidamada qalabka sida.
   r. Inaan la laalin xuquuqdiisa muwaaddinnimo shantii (5) sano ee ugu dambeysay.
   s. In uusan ku suntanayn hab-dhaqan lid ku ah Diinta Islaamka iyo dhaqanka suubban ee bulshada reer Puntland.
   sh. Inuu aqoon u leeyahay saldhigga iyo seynsaabka bulshada deegaankiisa.
   dh. In uusan dheef dhaqaale ka raadinayn xubinnimada Golaha Deegaanka isla markaasna karti iyo waayo-aragnimo ku soo kordhin karo degmada.
2. Ka hor inta aan loo oggolaan qofka u tartamaya musharaxnimada Golaha Deegaanka, Guddiga Doorashada ayaa hubinaya in musharaxu buuxiyey shuruudaha ku cad farqada 1-aad ee qodobkan.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 25-aad
Shuruudaha Lagu Lumin Karo Xubinnimada Golaha Deegaanka

1. Xubinnimada Golaha Deegaanka waxaa lagu waayi karaa; -
   b. Xubinta oo geeriyoota.
   t. Xubinta oo soo gudbisa is-casilaad qoraal ah, Goluhuna oggolaado.
   j. Xatooyo hanti dadweyne oo lagu go'aamiyey xukun kama dambays ah kaasoo ay soo saartay maxkamad awood u leh.
   x. Xubinta oo xukun kama dambays ah maxkamad awood u lihi ku xukunto.
   kh. Xubinta oo ku dhacda falal lid ku ah Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka kale ee Puntland.
   d. Xubinta oo isaga baxda Xisbigii ay ka tirsanayd.
   r. Xubinta oo ka maqnaata labo kalfadhi oo caadi ah oo isku xiga, isla mar ahaantaana aanay jirin sabab maangal ah.
2. Haddii xubin ka mid ah Golaha Deegaanka lumiso xubinnimadeeda, Xeerka Doorashada ayaa caddeynaya habraaca loo marayo doorashada xubinta cusub, waana in lagu dhaariyo soddon (30) beri gudohood laga bilaabo maalinta xubinta uu beddelayaa lumisay xubinnimada Golaha.
3. Asbaabta maqnaanshaha iyo oggolaanshaha farqadda 1-aad xarafka (r) waa in loo sameeyo hab-raac cad oo Dawladaha Hoose iyo Golaha Deegaanku leeyihiin isla markaasna Wasaaraddu la socoto.

Qodobka 26-aad
Xasaanadda Golaha Deegaanka

1. Xubin kasta oo ka mid ah Golaha Deegaanka lama xiri karo, lamana baari karo jirkiisa, deegaankiisa iyo gaadiidka uu markaas wato, haddii aan golaha deegaanku oggolaan codsi xasaanad ka qaadis ah oo uu soo gudbiyey Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud ama aan lagu qaban isagoo faraha kula jira fal-dembiyeed culus, sida uu qabo Dastuurka Dawladda Puntland.
2. Haddii ay caddaato in xubinta lagu qabto isagoo fal-dembiyeed gacanta kula jira waa in si degdeg ah loo gaarsiiyaa Guddoonka Golaha Deegaanka si xasaanadda looga qaado.
3. Xubinta lagu soo eedeeyo dembi si looga qaado xasaanadda waxaa la marayaa sida xeerku qabo.
4. Xasaanadda xubintu waxay ku eg tahay inta uu xilka hayo.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 27-aad
Tirada Golayaasha Deegaanka

1. Tirada golayaasha deegaanka waxaa lagu salaynayaa darajooyinka kala duwan ee degmooyinka sida: - (1-aad, 2-aad iyo 3-aad).
   b. Degmooyinka darajada 1-aad waxay yeelanayaan Gole deegaan oo ka kooban (15 xubnood).
   t. Degmooyinka darajada 2-aad waxay yeelanayaan Gole deegaan oo ka kooban (11 xubnood).
   j. Degmooyinka darajada 3-aad waxay yeelanayaan Gole deegaan oo ka kooban (9 xubnood).

Qodobka 28-aad
Qabsoomid La'aanta Doorashada Golayaasha Deegaanka

Haddii aysan ka qabsoomin doorashada golayaasha deegaanka Degmo ka mid ah Degmooyinka Puntland, waxay yeelanaysaa maamul ku meel gaar ah, iyadoo la sababaynayo duruufaha keenay inay ka dhici-weydo doorashada Golaha Deegaanku.

Qodobka 29-aad
Kala-Dirista Golayaasha Deegaanka

1. Golaha Deegaanka waxaa la kala diri karaa marka ay dhacaan arrimaha soo socda mid ka mid ah ama dhammaantood: -
   b. Marka ay is-casilaan saddex meelood labo meel (2/3) xubnaha Golaha Deegaanka.
   t. Marka goluhu fariisan waayo laba kal-fadhi oo isku xiga sabab Ia'aan.
   j. Marka dadweynihii soo doortay ee degmooyinka darajada 1-aad lix kun (6,000), darajada 2-aad afar kun (4,000), darajada 3-aad labo kun (2,000) oo qof ay Maxkamadda Degmada iska diiwaan galiyaan kuna hor saxiixaan, soona jeediyaan in la kala diro golaha.
   x. Mar kasta oo ay sugnaato in goluhu si bareer ah ugu xad-gudbey mabaadi'da Shareecada Islaamka iyo Dastuurka isla markaasna galay fal-dambiyeed wadareed weyn oo keeni kara in aysan sii shaqayn karin.
2. Haddii ay wada dhacaan ama mid ka mid ah dhaco arrimaha ku xusan faqrada 1-aad xarfaha (b, t, j iyo x) ee qodobkan, waxay Wasaaraddu samaynaysaa baaritaan ku saabsan eedaymaha, waxayna gun-gaarka baaritaanka u gudbinaysaa Madaxweynaha.
3. Madaxweynuhu markuu arko soo gudbinta wasaaradda ee gun-gaarka iyo baaritaanka faqrada 2-aad ee qodobkan, wuxuu Maxkamadda awoodda u leh u gudbinayaa qoraal uu ku dalbanayo sugnaanshaha arrimaha ku xusan faqrada 1-aad xarfaha (b, t, j iyo x) ee qodobkan.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

4. Markii ay u caddaato Maxkamadda gelidda arrimaha ku xusan farqada 1-aad ee xarfaha (b, t, j iyo x) ee qodobkan, waxay Madaxweynaha u gudbinaysaa inay sugnaatay eedaynta lagu soo oogey Golaha Deegaanka.
5. Madaxweynuhu marka uu helo caddaynta Maxkamadda, wuxuu soo saarayaa go'aanka kala dirista Golaha Deegaanka, isagoo isla qoraalkaasna ku caddaynaya in lagu soo doorto Golaha Deegaanka ee cusub muddo afartan iyo shan (45)-casho gudahood ah.

Qodobka 30-aad
Awoodaha Golaha Deegaanka

Golaha deegaanku wuxuu leeyahay awoodaha soo socda: -

1. Waxay la xisaabtamaan guddiga fulinta ee Dawladda Hoose.
2. Waxay xaqiijiyaan uruurinta canshuuraha, qaraamaadka iyo wixii xuquuq kale ah oo xeerka ama qawaaniinta kale ay siinayaan Dawladda Hoose iyo dakhli kasta oo ka yimaada hawlaha ay qabato Dawladda Hoose.
3. Waxay talo ku soo jeediyaan la wareegidda hanti dad kale leeyahay dan guud awgeed, iyadoo la bixinayo magdhaw u dhigma hantidaas sida uu qabo Dastuurka Dawladda Puntland.
4. Waxay xilka ka qaadi karaan guddoomiyaha Golaha Deegaanka ahna duqa degmada iyo ku xigeenkiisa markii ay gudan waayaan waajibaadkii loo xilsaaray.
5. Waxay kala diri karaan maamulka degsiimada, xaafadaha iyo tuulooyinka marka ay caddaato inay ka bayreen ujeeddooyinkii loo abuuray ama ka tarjumi waayaan danaha dadka deegaanka.
6. Wuxuu ka qayb-qaataa fulinta qorsheyaasha dawladda ee heer degmo oo ku wajahan adeegyada bulshada sida: waxbarashada aasaasiga ah, caafimaadka, xannaanada xoolaha, beeraha, nabadgelyada, biyaha, korontada, isgaarsiinta, ilaalinta deegaanka, dhiiri-gelinta ka faa'iidaysiga khayraadka badda, ka shaqaynta nadaafadda, horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha iyo guud ahaan mashaariicda horumarineed ee heer degmo.
7. Waxay go'aamiyaan wax-ka-bedelidda iyo joojinta khidmadaha laga qaado dadweynaha ee la xiriira adeegyada uu fuliyo golaha deegaanku iyo jaangoynta tabarucaadyo gaar ah oo laga rabo dadweynaha, laguna maalgeliyo mashaariicda danta guud ee laga fulinayo deegaanka.
8. Waxay ansixiyaan shaqaalaha qaybta dabagalka, guddiyada gaarka ah, kordhinta iyo dhimista shaqaalaha.
9. Waxay ansixiyaan Miisaaniyad sannadeedka degmada oo ah filasho dakhli iyo kharash isu dheelitiran.
10. Waxay dejiyaan xeer-hoosaadyo iyo awaamiir lagu fulinayo hawlaha uu xeerkani siinayo Dawladaha Hoose, kuwaas oo aan ka hor imaanayn Dastuurka iyo qawaaniinta kale ee Dawladda.

GARYAQAANKA GUUD OF DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

11. Waxay magacaabi karaan guddiyo gaar ah oo kala shaqeeya hawla gaar ah oo ka mid ah hawlaha xeerkani siinayo Golaha.
12. Waxay soo jeediyaan oo ansixiyaan wax-ka-bedelka canshuuraha iyagoo raacaya hab raacyada Wasaaradda, siinayana Wasaaradda ogeysiis.
13. Waxay dejiyaan oo ansixiyaan qorshaha horumarinta degmada kaas oo hirgelintiisa ay kala kaashanayaan maamulka dhexe ee Dawladda Puntland.
14. Waxay maamulaan hantida iyo dakhli kasta oo gacantooda soo gala, waxayna xisaab-celin tifaftiran u gudbiyaan Wasaaradda iyo Xisaabiyaha Guud.
15. Waxay xiriir iskaashi iyo wax wada qabsi la yeelan karaan magaalooyinka iyo golayaasha dhiggooda ah ee heer caalami iyo kuwa gudaha, waxayna ogeysiin siinayaan Wasaaradda.
16. Waxay qabtaan kulan sannadeed lagu dhegeysto Miisaaniyadda oo ay ka soo qayb galayaan qeybaha kala duwan ee bulshada deegaanka.
17. Waxay diyaariyaan canshuuraha degmada una gudbiyaan Wasaaradda ku shaqada leh, si looga ansixiyo Golaha Wakiillada.
18. Waxay gacan ka geystaan mashaariicda horumarineed ee ay degmada ka fulinayaan hay'adaha dawladda ee heer qaran, Puntland iyo gobol.
19. Waxay adeegsadaan guud ahaan awoodaha uu siinayo Dastuurka iyo Xeerarka kale ee Puntland.

Qodobka 31-aad
Habraaca Doorashada Guddoomiyaha Degmada iyo Ku-Xigeenkiisa

1. Xisbiga ku guulaysta aqlabiyada tirada xubnaha Golaha Deegaanka ee Degmada (50+1), waa in xubnaha Golaha Deegaanka ee xisbigaasi ay iska soo dhex doortaan Guddoomiyaha ahna duqa degmada iyo ku xigeenkiisa muddo aan ka badnayn soddon (30) maalmood.
2. Haddii xisbina ku guuleysan waayo tirada xubno ku filan inuu soo dhiso guddoomiyaha iyo ku xigeenkiisa sida ku xusan fargada 1-aad, waxay xisbiyadu geli karaan isbahaysi lagu muujiyo doorasho golaha dhexdiisa ah.
3. Haddii la waayo arrimaha ku xusan faqradaha 1-aad iyo 2-aad, Guddoomiyaha iyo ku-xigeenkiisa waxa ay ku imanayaan tartan doorasho oo xubnaha Goluhu dooranayaan si xor iyo xalaal ah, iyadoo la raacayo habraaca ku xusan farqadaha 4-aad ilaa 12-aad ee qodobkan.
4. Xubnaha u tartamaya guddoomiyaha iyo ku xigeenkiisa, waxaa soo sharraxaya xisbiga ay ka soo baxeen, mana jiri karo musharrax is-kiis ah oo aan xisbigiisu soo sharrixin.
5. Fadhiga ugu horeeya ee Golaha Deegaanka inta laga dooranayo guddoomiyaha iyo ku-xigeenkiisa, waxaa si ku-meel-gaar ah u sii guddoominaya xubinta ugu da'da weyn xubnaha Golaha Deegaanka.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

6. Guddoomiyaha ku-meel-gaarka ah ee ku xusan farqada 5-aad ee qodobkan ayaa golaha ka dhex qabanayaa guddi doorasho oo aan ka badnayn todoba (7) xubnood, kana yarayn saddex (3) xubnood, waxaana guddigaas kor joogtaynaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha Dawladda Puntland oo ku ilaalinaysa ku dhaqanka xeerka iyo habraaca sharci ee xeerkan qorayo.
7. Haddii qofka ugu da'da weyn u tartamayo jagada guddoomiyaha ama ku xigeenkiisa markaas waxaa guddoomiya xubinta da'a ahaan ku xigta ee Golaha Deegaanka.
8. Guddoomiyaha iyo ku-xigeenkiisa waxaa cod gacan taag ama qarsoodi ah ku dooranaya xubnaha Golaha Deegaanka.
9. Murashaxiinta u tartamaysa xilka guddoomiyaha/duqa iyo ku xigeenkiisa, waa inay yihiin xubno ka tirsan Golaha Deegaanka.
10. Murashax kasta waa inuu soo gudbiyaa qoraal muujinaaya inuu xisbigiisu soo sharraxay oo ay la socdaan labo sawir iyo taariikh nololeedkiisa/nololeedkeeda.
11. Codayntu waxay noqonaysaa ilaa saddex (3) wareeg: -
    b. Wareegga koowaad murashaxii hela codadka aqlabiyadda (2/3), tirada guud ee xubnaha Golaha Deegaanka ayaa ku guuleysanaya doorashada.
    t. Haddii la waayo murashax hela tiradaas waxaa loo gudbayaa wareegga labaad.
    j. Wareegga labaad waxaa ka qeyb galaya saddexda (3) murashax ee hela tirada codadka ugu badan wareegga koowaad.
    x. Haddii ay jiraan murashaxiin helay cod is le'eg oo barbar-dhac ah, waa ka wada-qaybgalayaan doorashada wareegga labaad, murashaxii hela codadka aqlabiyadda tirada guud ee xubnaha Golaha Deegaanka ayaa ku guuleysanayo doorashada. Haddii la waayo waxaa loo gudbayaa wareegga saddexaad.
    kh. Wareegga saddexaad waxaa ka qeyb-galaya labada (2) murashax ee ugu codadka badan wareegga labaad. Haddii uu jiro murashax seddexaad oo heley tiro la siman mid ka mid ah labada murashax ee isku soo haray, wuxuu isaguna ka qeyb galayaa wareegga saddexaad, waxaana doorashada ku guulaysanaya murashaxii hela cod hal-dheeri ah ee tirada xubnaha codeeyey.
    d. Haddii ay dhacdo in wareegga 1-aad ka dib ay isku soo haraan labo murashax oo kaliya, sababtuna ay tahay tanaasul ay ka tanaasuleen tartanka musharaxiinta kale, waxaa si toos ah loogu gudbayaa wareegga seddexaad, waxaana markaa meesha ka baxay wereeggii labaad.
    r. Labada murashax ee isku soo haray waxay ku kala guuleysanayaan cod hal dheeri ah tirada xubnaha codeeyey.
12. Markey codeyntu dhammaato wuxuu guddoomiyaha ku-meel-gaarka ah furayaa sanaadiiqda codeynta, waxaana la tirinayaa codadka, ka dibna waxaa guddoomiyuhu ku dhawaaqayaa natiijada doorashada ciddii ku

GUDDOOMIYAHA GUUD
STATE GENERAL SOLICITOR
DOWLADDA PUNTLAND
CARYAQAANKA GUUD

guuleysatay jagada guddoomiyaha Golaha Deegaanka/duqa degmada iyo ku-xigeenkiisa.

Qodobka 32-aad
Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Golaha Deegaanka/Duqa Degmada

1. Guddoomiyaha Golaha Deegaanka/Duqa degmada waa madaxa laamaha dawladda ee degmada, wuxuuna guddoomiyaa guddiyada Horumarinta iyo Nabadgelyada Degmada.
2. Waa madaxa fulinta ee dawladda hoose, wuxuuna isku-xiraa maamulka degmada iyo dawladda dhexe ee Puntland.
3. Wuxuu kormeeraa dhammaan shaqada Dawladda ee degmada.
4. Wuxuu shir-guddoomiyaa kulamada ay isugu yimaadaan Golaha Deegaanka, maamulka degsiimooyinka, guddiyada tuulooyinka iyo xaafadaha.
5. Wuxuu u-xil-saaran yahay fulinta go 'aanada Golaha Deegaanka iyo hawl maalmeedka maamulka degmada.
6. Wuxuu golaha isugu yeeri karaa kalfadhiyada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn waxa kale oo uu isugu yeeri karaa marka ay soo jeediyaan saddex meelood oo meel (1/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Deegaanka.
7. Wuxuu leeyahay saxiixa go'aamada rasmiga ah ee ka soo baxa Golaha Deegaanka iyo kuwa guddiga joogtada ah.
8. Wuxuu soo jeedinayaa xubnaha Guddiga Joogtada ah waxaana loo raacayaa sida ku cad qodobka 46-aad farqadiisa 1-aad.
9. Diyaarinta Miinsaaniyadda iyo qorshaha Dawladaha Hoose.

Qodobka 33-aad
Awoodda iyo Waajibaadka Ku-Xigeenka Gudoomiyaha Golaha Deegaanka

1. Ku-xigeenka guddoomiyaha degmadu wuxuu qabanayaa dhammaan xilka duqa degmadu qaban jiray markuu maqan yahay ama uu si ku- meel-gaar ah xilkiisa u gudan kari waayo, is casilo ama bukoodo.
2. Wuxuu kala taliyaa guddoomiyaha/duqa dhammaan hawlaha dawladda hoose.
3. Fulinta hawlaha uu guddoomiyuhu u wakiisho ee aan ka baxsanayn xilka iyo waajibaadka guddoomiyaha.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 34-aad
XiI-Waayista Guddoomiyaha Golaha Deegaanka Ahna Duqa Degmada iyo Ku- Xigeenkiisa

1. Guddoomiyaha Golaha Deegaanka ahna duqa degmada iyo ku-xigeenkiisu waxay xilka ku waayi karaan arrimaha soo socda; -
   b. xubinta oo geeriyoota.
   t. xubinta oo iscasilaad qoraal ah usoo gudbisa golaha.
   j. xubinta oo gudan waayo xilkiisa sababtay doonto haku timaadee.
   x. xubinta oo ku xad-gudubta Shareecada lslaamka, Dastuurka, xeerkan iyo qawaaniinta kale ee puntland.
   kh. Mar walba oo ay muddada xil-hayntu ka dhammaato.
   d. Xubinta oo ku kacda lunsasho hanti dadweyne oo ay go'aanna ka gaarto Maxkamadda awoodda u leh.
   r. Xukun kama dambays ah oo ay ku riddo Maxkamad awood u leh.
   s. Xubinta oo lumisa Xubinnimada Golaha Deegaanka sida ku cad Qodobka 25-aad ee Xeerkan.
2. Markay dhacaan arrimaha ku xusan xarfaha (j, x, d iyo r) ee farqada 1-aad ee qodobkan sabab kasta ha ku timaadee, ayna soo jeediyaan saddex meelood oo meel (1/3) tirada xubnaha Golaha Deegaanka, waxaa xilka lagaga qaadi karaa saddex meelood laba meelood (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Deegaanka.
3. Haddii ay dhacdo sabab kasta ha ku timaadee xil-waayista ku xusan qodobkan, waxaa guddoomiyaha cusub ahna duqa degmada lagu soo dooranayaa muddo dhan soddon (30) maalmood gudohood, iyadoo loo raacayo Qodobka 31-aad ee Xeerkan waxaana xilka sii haynaya ku-xigeenkiisa. Haddii xil-ka- qaadistu wada saamayso guddoomiyaha iyo ku-xigeenkiisa waxaa xilka sii haynaya xubinta golaha ugu da'ada weyn.
4. Haddii xubnaha Golaha Deegaanku ay soo gudbiyaan mooshin ka dhan ah Guddoomiyaha Degmada iyo Ku-xigeenkiisa, waxaa qabanaya xubinta ugu da'ada wayn Golaha Deegaanka oo aan qayb ka ahayn mooshinka, musharaxna aan ahayn.
5. Haddii ay ku caddaato in Guddoomiyaha Degmadu si ula kac ah dib ugu dhigay laba kalfadhi oo isku xiga oo Golaha Deegaanka ah, iyadoo aanay jirin sababo maangal ah, wuxuu luminayaa xilka Guddoomiyennimada Degmada.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 35-aad
Guddiga Horumarinta Degmooyinka

1. Degmo kasta oo ka tirsan Dawladda Puntland waxay yeelanaysaa Guddiga Horumarinta Degmada, guddigaas oo ka shaqeeya horumarinta adeegyada bulshada, kobcinta dhaqaalaha deegaanka iyo hirgelinta qorshayaasha horumarineed ee Degmada.
2. Xubnaha Guddiga Horumarintu waxay ka kooban yihiin: -
   b. Ganacsatada deegaanka.
   t. Culimaa'udiin-ka.
   j. Haweenka.
   x. xirfadlayaasha; - bahda caafimaadka, garyaqaanada, macalimiinta, beeralayda iyo ingineerada IWM.
   kh. Dadka hal-doorka ah ee bulshada ku dhex leh magac wanaagsan, kuna suntan ka shaqaynta danta guud.
3. Guddiga Horumarinta waxaa dhisiddiisa ka tashanaya Wasiirka Wasaaradda Arrimha Gudaha iyo Guddoomiyaha Degmada.
4. Guddiga Horumarinta Degmada waxay ka shaqaynayaan mashaariicda horumarinta degmadooda.
5. Dhaqaalaha soo gala Guddiga Horumarinta Degmada, waa in uu daah-furnaado oo la jaan-qaado hab-raacyada maaliyadeed ee Dawladda Puntland si loo xoojiyo hufnaanta, isla xisaabtanka iyo waxtarka bulshada.
6. Guddoomiyaha Degmada oo la tashanaya Golaha Deegaanka ayaa go'aan ka gaaraya meelaha mudan horumarinta mashaariicda ee Degmada gudaheeda.
7. Guddiga Horumarinta Degmada ma yeelan doono xuquuq mushahar ama gunno maaddaama ay u taagan yihiin wax-ku-biirinta danta guud ee bulshada.

Qodobka 36-aad
Magacaabidda Guddiga Horumarinta Degmooyinka

1. Guddiga Horumarinta waxaa soo jeedinaya Guddoomiyaha Golaha Deegaanka ahna Duqa Degmada, waxaana wareegto magacaabis ku soo saarayaa Wasiirka Wasaaradda.
2. Marka la dhisayo Guddiga Horumarinta Degmooyinka, waxaa la tixgelinayaa talooyinka xubnaha Golaha Deegaanka iyo qeybaha kala duwan ee bulshada si loo dhawro hufnaanta iyo wax-tarnimada xubnaha guddiga.
3. Guddiga Horumarinta Degmooyinku waa in ay dhawraan xeerarka Puntland, hufnaanta maaliyadeed iyo isla xisaabtanka.
4. Dhaqaalaha ay uruuriyaan ayna maamulayaan Guddigu waa in la mariyo hannaanka maaliyadeed, isla markaasna waa inay Hay'adaha maaliyada

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

usoo gudbiyaan xisaab-xir iyo warbixinno muujinaya sida loo maamulay iyo meesha ay ku baxday.

Qodobka 37-aad
Waajibaadka/Shaqada Guddiga Horumarinta Degmada

Guddiga Horumarinta Degmadu wuxuu: -

1. Ka caawiyaa Golaha Deegaanka iyo duqa degmada qorshaha horumarineed ee degmada.
2. U doodaa danaha horumarineed ee degmada.
3. Kormeeraa isla markaana dabagal ku sameeyaa mashaariicda horumarineed ee soo mara Guddiga.
4. U qareemaa baahiyaha degmada.
5. Ka shaqeeyaa isku xirka bulshada rayidka ah, ganacsatada iyo maamulka degmada.
6. Diyaariyaa warbixino sanadle ah iyo xisaab-xir ku saabsan wax qabadka horumarimeed ee sanduuqa dhaqaalaha ay ururiyaan, maamulaan una gudbiyaa Duqa Degmada.

Qodobka 38-aad
Guddiga Fulinta ee Degmada

Guddiga fulinta ee Degmadu wuxuu ka kooban yahay; -

1. Guddoomiyaha Golaha Deegaanka ahna Duqa Degmada.
2. Ku-xigeenka Guddoomiyaha Golaha Deegaanka ahna Duqa Degmada.
3. Xoghayaha Dawladda Hoose.

Qodobka 39-aad
Waajibaadka Guddiga Fulinta

Guddiga fulinta Degmada wuxuu u-xil-saaran yahay: -

1. Fulinta hawl-maalmeedka maamulka Degmada.
2. Kormeerka iyo hubinta habsami u socodka hawlaha Degmada.
3. Fulinta meel-marinta iyo dhaqan gelinta go'aannada Golaha Deegaanka ee degmada.
4. Fulinta xeerarka, go'aannada iyo amarada ka soo baxa guddiga joogtada ah ee Golaha Deegaanka degmada iyo xukuumadda.
5. Diyaarinta, fulinta iyo ku dhaqanka Miisaaniyadda.
6. Dhaqan-gelinta, meel-marinta iyo kormeerka mashaariicda horumarineed.
7. Diyaarinta warbixinno fulineed oo ku saabsan hawlaha qabsoomay intii u dhexeysay kalfadhiyada Golaha iyo kuwa aan qabsoomin, iyagoo u gudbinaya Guddiga Joogtada ah iyo Golaha Deegaanka markuu Goluhu furmo.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

8. U soo bandhigidda guddiga joogtada ah amarada deg-dega ah ee ka soo baxa xukuumadda ee aan sugi karayn kalfadhiga Golaha.
9. Isticmaalka kharashyada si waafaqsan Miisaaniyadda Dawladaha Hoose.
10. Haynta, bixinta dhul iyo hanti kale dan guud awgeed ka dib markuu oggolaansho ka helo guddiga joogtada ah.
11. Soo jeedinta canshuur dejinta, kordhinta, dhimista, qiimaynta iyo khidmad saaridda shatiyada iyo adeegyada kale, waxayna u soo gudbinayaan Golaha Deegaanka ama guddiga joogtada ah ee heer Degmo.
12. Waxay heshiisyo la geli karaan cid kasta oo dan guud ka shaqaysa wixii heer Degmo ah waxayna u gudbinayaan guddiga joogtada ah ama Golaha Deegaanka.
13. Waxay la xiriiri karaan, macaamilna la yeelan karaan Shirkad, qof iyo wixii ka badan ee khuseeya xilkooda, waxayna ka ansixinayaan guddiga joogtada ah ama Golaha Deegaanka.
14. Waxay matali karaan cid kasta iyo hawl kasta oo qayb ay ka tahay Dawladda Hoose.
15. Waxay bixin karaan shaqaale, qalab, adeeg iyo hoy mar kasta oo baahi timaado dan guud awgeed. Waxayna u gudbinayaan guddiga joogtada ama Golaha Deegaanka.

Qodobka 40-aad
Guddiga Xallinta Khilaafaadka Dhulka

1. Si loo xalliyo khilaafaadka dhulka ee ka dhasha gudaha degmooyinka iyo gobollada Puntland, waxaa la dhisayaa Guddiga Xallinta Khilaafaadka Dhulka, kaas oo ah guddi farsamo.
2. Wasaaraddu waxay soo saaraysaa xeer-nidaamiyaha Guddiga Xallinta Khilaafaadka.
3. Guddiga Xallinta Khilaafaadka Dhulka wuxuu ka koobnaanayaa xubnaha hoos ku xusan, kuwaasoo lagu soo xulo aqoon, khibrad, dhex-dhexaadnimo iyo sumcad bulsho: -
   b. Laba xubnood oo ka socda culimada, kuwaas oo leh aqoon diineed.
   t. Xubin ka socota nabadoonnada oo leh khibrad iyo karti la xiriirta dhex-dhexaadinta, laguna yaqaano caddaalad.
   j. Xubin injineer ah oo leh aqoon iyo waayo-aragnimo ku saabsan maaraynta, cabbirka iyo isticmaalka dhulka.
   x. Xubin qareen ah oo leh aqoon iyo waayo-aragnimo oo ka qayb qaata hubinta in go'aannada iyo talooyinka guddigu waafaqsan yihiin Dastuurka iyo xeerarka.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 41-aad
Waajibaadka Guddiga Xallinta khilaafaadka Dhulka

1. Guddi kasta ee xallin khilaaf waa inuu awood u leeyahay inay: -
   b. Eegaan, xaqiijiyaana caddaymaha ay u soo gudbiyeen dhinacyada is haya.
   t. Si iskood ah u baaraan, u helaan dib u eegisna ugu sameeyaan caddeymaha lagama maarmaanka u ah gaaridda go'aan degdeg ah oo caddaalad ku salaysan, waafaqsana xeer nidaamiyaha Guddiga Xallinta Khilaafaadka Dhulka iyo shuruucda kale ee Puntland.
   j. U yeeraan qof kasta oo dhinac ka ah ama markhaati ka ah dacwadda.
   x. Go'aan ka gaaraan xallinta dacwadaha la xiriira dhulka, waxaana go'aanka guddiga rafcaan looga qaadan kara Maxkamadda Sare muddo soddon (30) maalmood gudahood ah, go'aanka Guddigu wuxuu noqonayaa kama dambays haddii aan rafcaan laga qaadan.
   kh. Soo saaraan amaro ku meel gaar ah si loo xafido xaalada dhulku ku sugan yahay.
   d. Ka codsadaan maxkamada darajada 1-aad ee degmada fullinta go'aankooda.
   r. Isticmaalaan awoodaha kale ee xeer-nidaamiyahoodu siinayo.

Qodobka 42-aad
Shuruudaha Lagu Xulanayo Xoghayaha Dawladda Hoose

Qofka loo magacaabayo Xoghayaha Dawladda Hoose waa in uu buuxiyaa shuruudaha hoos ku xusan: -

1. Waa inuu leeyahay waxbarasho jaamacadeed oo xiriir la leh shaqadiisa.
2. Waa inuu leeyahay ugu yaraan Shan (5) sano oo waaya aragnimo la xiriirta maamulka iyo maaraynta.
3. Waa inuu yahay shakhsi Ku tilmaaman karti iyo hufnaan, bulshadana ku dhex leh sumcad wanaagsan.
4. Waa inuu aqoon buuxda u leeyahay deegaanka uu ka shaqaynayo.

Qodobka 43-aad
Magacaabista Xoghayaha Dawladda Hoose

Dawladda Hoose waxay yeelanaysaa Xoghaye, kaas oo uu magacaabayo Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta Dawladda Puntland.

Qodobka 44-aad
Xil waayidda Xoghayaha Dawladda Hoose

1. Xoghayaha Dawlada Hoose wuxuu xilka ku waayi karaa;
   b. Haddii xil ka qaadis lagu sameeyo.
   t. Haddii uu iscasilo lagana aqbalo.
   j. Haddii uu gudan waayo xilkiisa sababo caafimaad darro awgeed.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

x. Haddii lagu soo eedeeyo dembi ciqaab ah.

Kh. Haddii uu ku kaco falal lid ku ah Shareecadda Islaamka, hab dhaqanka dadka, Dastuurka iyo Xeerarka kale ee Puntland.

2. Markay dhacaan xarfaha (x iyo kh) ee ku xusan farqada 1-aad waa in Wasaaradda loo gudbiyo, isla markaana ay Wasaaraddu ka joojiso shaqada.
3. Marka Guddoomiyaha Golaha Deegaanka ahna Duqa Degmadu rabo inuu Xoghayaha shaqo ka joojiyo waa inuu raacaa saddexdan tallaabo;

b, Marka hore, digniin afeed ayuu siinayaa Xoghayaha.

t, Marka labaad, digniin qoraal ah ayuu siinayaa Xoghayaha isagoo ogaysiinaya Guddiga Joogtada iyo Wasaaradda.

J, Marka saddexaad wuxuu u gudbinayaa Guddiga Joogtada waxayna ku samaynayaan shaqo joojin rasmi ah oo aan ka badnayn 7 cisho.

x. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha ayaa u diraya guddi soo hubiya markay dhacaan xarfaha (b, t iyo j) ee ku xusan farqadan.

4. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha marka uu helo go'aan kama dambaysta ee ku qoran farqada 3-aad ee qodobkan waxaa uu xilka ka qaadayaa Xoghayaha Dawladda hoose.
5. Marka xilka laga qaado Xoghayaha ama ay bannaanaato jagada si waafaqsan farqada 1-aad xafraha (b iyo t), waxaa Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha waajib ku ah inuu muddo 14-maalmood gudahood ku magacaabo Xoghayaha cusub ee Dawladda hoose.
6. Muddada la soo magacaabayo xoghayaha cusub waxaa hawsha si ku meel-gaar ah u sii wadaya Agaasimaha Waaxda Maamulka iyo Maaliyada ee Dawladda Hoose ee Degmada.
7. Haddii Wasiirku u arko in loo baahdo in la beddelo Xoghayaha Dawladda Hoose sababo kale dartood kuwaas oo aan la xiriirin xarfaha ku xusan farqada 1-aad ee qodobkan, ayna ka mid yihiin dib-u-habayn, isbeddel istiraatiiji ah, xil kale oo dawladeed, ama xaalad amni wuxuu soo saarayaa wareegto wasiir xil ka qaadis.

Qodobka 45-aad
Xilka iyo Waajibaadka Xoghayaha Dawladda Hoose

1. Xoghayaha iyo shaqaalaha Dawladda Hoose waxay hoos imaanayaan Guddoomiyaha Golaha Deegaanka ahna Duqa Degmada.
2. Xoghayaha iyo shaqaalaha kale waxay mas'uul ka yihiin fulinta awaamiirta uu siiyo Guddoomiyaha Golaha Deegaanka ahna Duqa Degmada ee waafaqsan xeerkan iyo qawaaniinta kale ee Puntland.
3. Waa maamulaha lacagta Dawladda Hoose ee Degmada.
4. Wuxuu madax u yahay shaqaalaha Dawladda Hoose.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

5. Wuxuu mas'uul ka yahay kharashka iyo dakhliga Dawladda Hoose, waxaana uu ilaaliyaa habsami u socodka hawl maalmeedka iyo habka adeegga Dawladda Hoose.
6. Wuxuu mas'uul ka yahay shaqo fulinta shaqaalaha iyo xuquuqda shaqaalaha.

Qodobka 46-aad
Guddiga Joogtada Ah

1. Guddiga Joogtada ahi wuxuu ka koobnaanayaa saddex meelood meel (1/3) Xubnaha Golaha Deegaanka ah, kuwaas uu soo jeediyo Guddoomiyaha Golaha Deegaanka waxaana oggolaanshahooda ka doodaya xubnaha Golaha Deegaanka.
2. Guddiga joogtada ahi wuxuu si toos ah ula socdaa, kormeera shaqada Waaxyaha Dawladda Hoose ee Degmada, si loo hubiyo habsami u socodka shaqada Dawladda Hoose.

Qodobka 47-aad
Waajibaadka Guddiga Joogtada ah

1. Guddiga joogtada ah wuxuu; -
   b. Fulinayaa hawlaha Golaha Deegaanka muddada u dhexaysa labada kalfadhi.
   t. U bandhigaa Golaha Deegaanka hawlaha uu qabto si loo ansixiyo.
   j. U soo gudbiyaa Golaha Deegaanka warbixin dhammeystiran oo ku saabsan hawlaha iyo go'aamada ay qaateen inta u dhaxaysay labada kalfadhi.
   x. Leeyahay soo jeedinta dhismaha degsiimooyinka, xaafadaha iyo tuulooyinka, si loo dardargeliyo adeegyada bulshada iyo horumarinta deegaanka.

Kh. Ansixiyaan miisaaniyadda ku-meel-gaarka ah ee Degmadu ku shaqeyn karto haddii kalfadhiga Golaha Deegaanka dib u dhaco ama hakad galo.

Qodobka 48-aad
Kulamada iyo Go'aamada Guddiga Joogtada ah

1. Guddiga Joogtada ahi waxay yeelanayaan fadhiyo caadi ah iyo kuwo aan caadi ahayn.
2. Guddiga joogtada ahi waxay kulmayaan bishiiba mar ugu yaraan ama todobaadkiiba mar haddii baahi timaado.
3. Fadhiyada guddiga joogtada ah waxay ku ansaxayaan markay joogaan saddex- meelood laba meelood (2/3) tirada xubnaha guddiga joogtada ah.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

4. Dhammaan go'aamada guddigu waxay ku meel-marayaan cod hal-dheeri ah, haddiise natiijada cod-bixintu ay laba jeer is Ie'ekaato waxaa mar saddexaadka cod dheeri ah yeelanaya guddoomiyaha guddiga.

Qodobka 49-aad
Guddiga Maamulka Xaafadaha

1. Guddiga Maamulka xaafadaha waxay ka kooban yihiin todoba (7) xubnood mana leh awood is-maamul sida golaha heer Degmo.
2. Guddiga xaafaddu waxay u-xil-saaran yihiiin arrimaha soo socda; -
   b. Isku xirka Golaha Deegaanka Degmada iyo dadweynaha xaafadda.
   t. Xaqiijinta in adeegyada loo baahan yahay ay gaaraan xaafadda.
   j. Fulinta go'aamada, qoryashaasha iyo shuruucda ka soo baxa maamulka degmada.
   x. Ka qeyb-qaadashada kobcinta dakhliga degmada.
   kh. Xoojinta amniga iyo deganaanshaha xaafadda.
   d. Waxay ka qayb qaataan wixii kale ee hawlo ah ee maamulka degmadu u igmado.
3. Guddiga maamulka xaafaddu waxay yeelanayaan guddoomiye, ku-xigeen iyo xoghayn, waxaana xeer-hoosaad ay isku maamulaan soo saaraya Golaha Deegaanka degmada.

Qodobka 50-aad
Maamulka Degsiimada iyo Guddiyada Tuulooyinka

1. Maamulka degsiimada iyo guddiyada tuulooyinka waxaa iska soo dhex dooranaya bulshada degsiimada iyo tuulada.
2. Dadweynaha sida joogtada ah u degan degsiimada waxay labadii sano mar iska soo dooranayaan maamulka degsiimadooda oo ka kooban shan (5) xubnood, waxaana ansixinaya Golaha Deegaanka ee Degmada.
3. Dadweynaha tuuladu waxay yeelanayaan guddi maamul oo kala mid ah habka iska soo dhex doorashada, mudda-xileedka iyo magacaabista guddiga maamulka degsiimada, waxayna ka kooban yihiin saddex (3) xubnood.
4. Guddiyada maamul ee heer Degsiimo iyo Tuulo waxay iska dhex dooranayaan guddoomiye iyo ku-xigeen, waxaana xeer-hoosaad ay isku maamulaan soo saaraya Golaha Deegaanka.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 51-aad
Awoodaha Guddiga Maamulka Degsiimada iyo Tuulada

1. Guddiyada degsiimada iyo tuuladu malaha awood is-maamul sida Golaha Deegaanka Degmada.
2. Guddiyada degsiimada iyo tuuladu waxay: -
   b. fuliyaan go'aamada, qoryashaasha iyo shuruucda ka soo baxa Golaha Deegaanka heer degmo.
   t. Waxay ururiyaan, una gudbiyaan Waaxda Qorshaynta Degmada baahiyaha gaarka ah ee deegaanka ay matalaan.
   j. Waxay fuliyaan hawlaha ay u igmato Dawladaha Hoose iyo dawladda dhexe.
   x. Waxay xalliyaan khilaafaadka ka dhex jira dadweynaha deegaankaas.
   kh. Waxay ka qayb qaataan sugidda amniga.
   d. Waxay ka hortagaan nabaad-guurka iyo xaalufka deegaanka.
   r. Waxay ka qayb qaataan mashaariicda iskaa-wax-u-qabso iyo abaabulka dakhliga.
   s. Waxay qabtaan wixii kale oo hawlo ah ee maamulka degmadu u igmado.
   Sh. Waxay ka qayb qaataan xal u helidda musiibooyinka dabiiciga ah ee ka dhaca deegaanka.

Qodobka 52-aad
Shirarka Golaha Deegaanka

1. Kalfadhiga ugu horeeya ee Golaha Deegaanka waxaa la qabanayaa soddon (30) maalmood gudahood, ka dib marka ay ku dhawaaqdo Maxkamada Sare Natiijada kama dambaysta ah ee doorashada xubnaha Golaha Deegaanka, waxaana shaacinaysa oo qaban qaabinaysa Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
2. Shirarka kale ee Golaha Deegaanka waxaa isugu yeeraya Guddoomiyaha Golaha Deegaanka ahna Duqa Degmada ama waxaa soo jeedinaya saddex meelood oo meel (1/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Deegaanka.
3. Golaha Deegaanka wuxuu kulmayaa lixdii (6) biloodba mar, Guddiga Joogtada ahi waxay kulmayaan bishiiba mar ugu yaraan.
4. Kalfadhiga Golaha Deegaanka waxaa lagu qaban karaa Xarunta Dawladda Hoose ama meel kale oo ay u asteeyeen Maamulka Degmadu.
5. Furitaanka kalfadhiga waa in lagu soo bandhigaa Ajandaha ku meel gaarka ah.
6. Golaha Deegaanka wuxuu isugu imaan karaa kalfadhiyo caadi ah iyo kuwo aan caadi ahayn.
7. Shirarka golayaasha deegaanka waxay u furan yihiin dadweynaha inay dhegeystaan haddii aanu ahayn shir albaabadu u xiran yihiin.

8. Kalfadhiyada Goleyaasha Deegaanku waa in ay ku qabsoomaan muddada u astaysan lixdii bilood-ba mar, lamana baajin karo, iyadoo aysan jirin sababo maangal ah.
9. Haddii ay dhacaan sababo loo qaateen ah oo loo baajin karo kalfadhiyada caadiga ah ee Goleyaasha Deegaanka, waa in loo soo gudbiyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha, kadibna Wasaaraddu go'aan ka gaartaa.
10. Haddii la qaban waayo kalfadhiyadii u astaysnaa Goleyaasha Deegaanka, waxaa soo fara-gelinaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyada oo u mudaynaysa wakhtiga ugu habboon ee la qaban karo kalfadhiga.
11. Qaabka Wasaaradda Arrimaha Guduhu u fara-gelinayso qabsoomid la'aanta kulanka Caadiga ah ee Golaha Deegaanku wuxuu ku imaanayaa si daah-furan oo ku dhisan turxaan bixin iyo xal-ka-gaarid, maadaama Goleyaasha Deegaanku leeyihiin awoodda qabsashada kulammadooda.

Qodobka 53-aad
Ansaxa Shirarka Golaha Deegaanka

1. kalfadhiga 1-aad ee lagu dooranayo Guddoonka Golaha Degaanka waa in ay fadhiyaan saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Deegaanka.
2. Fadhiyada kale ee Golaha deegaanku waxay ku furmayaan hal-dheeri (1/2+1) tirada guud ee xubnaha Golaha.
3. Go'amada goluhu waxay ku meel-marayaan cod hal dheeri ah, haddiise natiijada cod-bixintu ay laba jeer is le'ekaato waxaa mar saddexaadka cod dheeri ah yeelanaya Guddoomiyaha.

Qodobka 54-aad
Hadal-Qoraalka iyo Diiwaan-gelinta

1. Dhammaan shirarka Golaha Deegaanka iyo guddiyada kale waa in dooddooda lagu sameeyo hadal-qoraal.
2. Hadal qoraalka Golaha Deegaanka waa in la diiwaangeliyaa lana kaydiyaa iyadoo uu mas'uul ka noqonayo Xoghaynta Golaha Deegaanka.
3. Hadal qoraalka Golaha Deegaanka iyo kan guddiga joogtada ah waxaa qaadaya Xoghaynta Golaha Deegaanka wuxuuna xaq u leeyahay inuu ra'yigiisa ka dhiibto shirarka hase yeeshee cod kuma laha.
4. Xoghaynta Golaha Deegaanka waxaa magacaabaya guddoomiyaha Golaha Deegaanka marka uu la tashado guddoomiye ku-xigeenka.
5. Dawladda hoose waa in ay u shaqeysaa sida hay'adaha kale ee dawladda, waana in uu jiraa hannaan warbixineed oo koobaya dhammaan hawl-qabadka iyo shirarka dhexdeeda ah, Dawladda hoose iyo hay'adaha kale ee bah-wadaagta la ah waa inay ku wada shaqeeyaan hab rasmi ah oo xiriir hay'adeed iyo warbixin ku dhisan.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 55-aad
Gunnooyinka Golayaasha Deegaanka

1. Dhammaan mutaysiga dheef lacageed ee dawladda hoose dhexdeeda iyo xiriirka ay la leedahay hay'adaha kale ee dawladdu waa in uu ka hufnaadaa danaha is diiddan iyo eexsi maaliyadeed, isla markaasna waa in uu cadyahay oo daah-furanyahay habraaca maaliyadeed ee Dawladda hoose.
2. Guddoomiyaha Golaha Deegaanka iyo ku-xigeenkiisu waxay leeyihiin gunno xil uu goluhu u xaddido una ansixiyo.
3. Guddiga joogtada ah oo aanay ku jirin xubnaha guddiga fulintu waxay yeelanayaan gunno bileed iyo gunno kalfadhi oo goluhu u xaddido una ansixiyo.
4. Xubnaha kale ee goluhu waxay yeelanayaan gunno kalfadhi oo goluhu u jaangooyo.
5. Guddi hoosaadyadu waxay yeelanayaan gunno fadhi uu goluhu u xaddido una ansixiyo.
6. Guddiyada Golaha Deegaanku markay u baxayaa safar shaqo waxa ay yeelanayaan sahay safar oo goluhu u jaangooyo.
7. Gunnooyinka ku tilmaaman faqradaha 2-aad, 3-aad, 4-aad, 5-aad iyo 6-aad ee qodobkan waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda Dawladaha Hoose ee Degmada.

Qodobka 56-aad
Guddiga Nabadgelyada Degmada

1. Guddiga nabadgelyada degmadu wuxuu ka kooban yahay-
   b. Guddoomiyaha degmada (Duqa degmada), oo ah guddoomiyaha guddiga.
   t. Ku-xigeenka Guddoomiyaha degmada.
   j. Taliyaha Saldhigga Dhexe ee Booliska Degmada.
   x. Taliyeyaasha Rugaha ee Booliska Degmada ee lagama maarmaanka ah.

Qodobka 57-aad
Xilka iyo Waajibaadka Guddiga Nabadgelyada

1. Waajibaadka guddiga nabadgelyada waxaa ka mid ah;
   b. Ilaalinta xasiloonida iyo amniga degmada.
   t. Ka hortegidda dembiyada iyo wax ka qabadka dembiyada dhaca.
   j. Wixii kale ee wax u dhimaya amniga iyo nabadgelyada degmada.
2. Guddiga Nabadgelyada degmadu waxay warbixintooda u gudbinayaan Gobolka iyo Wasaaradda.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

CUTUBKA 5-aad
AWOODAHA MAAMUL IYO XEER-DEJIN EE DAWLADAHA HOOSE

Qodobka 58-aad
Waaxyaha Dawladaha Hoose

1. Dawladaha Hoose waxay yeelanayaan:-
   b. Waaxda Hawlaha Guud.
   t. Waaxda Arrimaha Bulshada.
   j. Waaxda Maaliyadda.
   x. Waaxda Dakhliga.
   Kh. Waaxda Qorshaynta, Kormeerka iyo Dabagalka.
   D. Waaxda Maareynta Masiibooyinka iyo Isbedalka Cimilada.
2. Degmadii qaadi karta waaxyo ka badan kuwa qodobkan ku xusan waxay hor gaynaysaa Golaha Deegaanka waxaana laga ansixinayaa shirarka Golaha Deegaanka, iyadoo la ogaysiinayo wasaaradda.
3. Degmadii aan qaadi karin waaxyaha kor ku xusan waxay hawlaha waaxyahaasi qabanayaan ku soo uruurin karaan Waaxyaha Qorshaynta, Maaliyadda, Hawlaha Guud iyo Arrimaha Bulshada.

Qodobka 59-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Qorshaynta

1. Dawladaha Hoose waxay mas'uul ka yihiin dejinta qorshayaasheeda horumarineed ee wakhtiga dhaw iyo wakhtiga fog, iyagoo waafajinaya qorshaha horumarinta guud ee Dawladda.
2. Waaxda Qorshaynta ee Dawladaha Hoose ayaa qaabilsan dejinta qorshayaasha, iyadoo si dhaw ula shaqaynaysa waaxyaha kale.
3. Dawladaha Hoose waxay xaqiijinayaan in qorshayaasheeda wakhtiga dhaw iyo wakhtiga fog noqdaan kuwa ka tarjuma baahiyaha dhabta ah ee degmada.

Qodobka 60-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Bixinta Adeegyada Bulshada

Dawladaha Hoose waxay mas'uul ka yihiin: -

1. Dhisidda iyo dayactirka dugsiyada aasaasiga ah, dugsiyada Qur'aanka, xannaanada carruurta, dugsiyada agoonta, naafada iyo Masaajidda.
2. Maamulidda caafimaadka aasaasiga ah.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

3. Dawladaha Hoose ee heerka 1-aad iyo 2-aad waxay mas'uul ka yihiin xaqiijinta bixinta adeegyada biyaha iyo korontada oo la wada heli karo, lana wada awoodo.
4. Biyo dhaaminta xilliyada ay abaaruhu dhacaan.
5. Dhismaha guryo loogu talo galay dadweynaha degmada ee danyarta ah.
6. Dhismaha, dayactirka iyo maamulka xarumaha xannaanada agoomaha iyo dadka garaad-dhimanka ah.
7. Waxay ku abaabulaysaa ganacsatada iyo bulshada bixinta sekada iyo sadaqaadka kale si loogu daryeelo danyarta degmada.
8. Dhammaan adeegyada qodobkan ku xusan iyo adeegyada kale ee dawladda hoose waa in ay waafaqaan Xeerkan.

Qodobka 61-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Nadaafadda iyo Fayo-dhowrka

Dawladaha Hoose waxay mas'uul ka yihiin: -

1. Maaraynta habka bullaacadaha iyo biyo saarka magaalooyinka.
2. Xakamaynta qashinka (adkaha ah iyo kan dareeraha ah) iyo ka hortagga wax kasta oo guud ahaan wax u dhimi kara faya-dhawrka iyo bilicda magaalada, waxayna astaynaysaa goobo dadku ku ururiyaan qashinka.
3. Waxay xaqiijinaysaa habka ugu wanaagsan ee qashinka loo gubi karo, loo aasi karo ama loogu daadin karo goob gaara oo aanay ka dhalan dhibaato caafimaad ama deegaan.
4. Ka hor-tagga iibka cuntada, sharaabka, daawada iyo dhammaan walxaha iyo agabyada kale ee taariikhda isticmaalkooda dhacsan yahay ama la ogaado inay khatar ku yihiin caafimaadka dadka iyo duunyada.
5. Hubinta iyo sugidda caafimaadka xoolaha daabaxa ah ka sokow waxaa Dawladaha Hoose mas'uul ka yihiin u feejignaanta ka hor-tagga cudurada faafa ee ka dhasha nadaafad-darada siiba goobaha gawraca, sariibadaha hilibka, kalluunka iyo qudaarta oo loo baahan yahay joogtaynta nadaafadooda.

Qodobka 62-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose ee La Xiriira Maamulka Hawlaha Guud

Dawladaha Hoose waxay mas'uul ka yihiin: -

1. Maamulka iyo ilaalinta dhulka danta guud, kan gaarka loo leeyahay iyo xallinta ismaandhaaf kasta oo ka dhasha dhul, iyadoo wixii ay xallin weydo u gudbinaysa maxkamadda awoodda u leh.
2. Waxay bixinaysaa dhulka lagu fulinayo hawlaha la xiriira danta guud si waafaqsan naqshadda magaalada.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

3. Waxay horumarinaysaa isticmaalka dhulka magaalooyinka iyo ka hortagga dhul habsiga sharci darrada ah.
4. Dhismaha waddooyinka dhex-mara degmada iyo nawaaxigeeda ilaa shan (5) kiilo mitir oo magaalada ka baxsan.
5. Waxay bixinaysaa ciwaanada, lambarada guryaha, dhulalka iyo waddooyinka.
6. Waxay diiwaangelinaysaa hantida maguurtada ah ee dadweynaha degmada ku nool.
7. Waxay abaabulaysaa oo nidaaminaysaa gaadiidka dadweynaha ee magaalooyinka dhexdooda.
8. Ifinta magaalada, waxayna nalal ka taagaysaa dhammaan waddooyinka iyo goobaha kale ee danta guud.
9. Waxay hubiyaan in dhammaan dhismayaasha iyo goobaha danta guud ee degmadu ay leeyihiin adeegyo ay isticmaalaan dadka baahiyaha gaarka ah qaba.

Qodobka 63-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose ee La Xiriira Shaqaalaha

1. Shaqaalaha Dawladaha Hoose waa shaqaale dawladeed, waxaana waajibaadkooda iyo xuquuqdooda lagu nidaaminayaa xeer gaar ah oo ay soo diyaariso Wasaaraddu, Golaha Wakiilladuna ansixiyo.
2. Dawladda Hoose ayaa ka mas'uul ka ah qorista, dallacsiinta iyo ruqsaynta shaqaalaha degmada, waxaana uga mas'uul ah guddiga fulinta si waafaqsan xeerka.
3. Qofka shaqaale ah ee cabasho ka qaba go'aanka guddiga fulinta wuxuu cabashadiisa u gudbin karaa Golaha Deegaanka, haddii aanu ku qancin go'aanka Golaha Deegaanka, wuxuu dacwad u gudbin karaa Maxkamadda awoodda u leh.

Qodobka 64-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Diiwaan-Gelinta Dadka

1. Dawladaha Hoose waxay bixinayaan oo diiwaangelinayaan shahaadooyinka guurka, furniinka, dhalashada iyo dhimashada.
2. Dawladaha Hoose waxay u abuurayaan mid kasta oo ka mid ah arrimaha ku xusan faqrada 1-aad ee qodobkan diiwaan gaar ah oo lagu kaydiyo.
3. Dawladaha Hoose waxay bixinayaan dhalashada iyo sugnaanta (dad dhigis).
4. Dawladaha Hoose waxay abuurayaan xafiis gaar ah oo qaabilsan arrimaha la xiriira diiwaangelinta dadka.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 65-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose ee La Xiriira Iibka iyo Qandaraasyada

1. Dawladaha Hoose waxay u madaxbannaan yihiin maamulka iibka iyo qandaraasyada, waxayna yeelanayaan guddi gaar ah oo u qaabilsan arrimaha iibka iyo qandaraaska kaas oo u xilsaaran; -
   b. Qorshaynta iibka iyo qandaraaska.
   t. Diyaarinta dukumintiyada iibka iyo qandaraaska.
   j. Xaqiijinta ku dhaqanka habraacyada iyo shuruucda iibka iyo qandaraasyada.
   x. Ilaalinta hufnaanta iyo daah-furnaanta geedi socodka dhammaan heerarka kala duwan ee iibka iyo qandaraas bixinta.
   kh. Furista iyo qiimaynta qandaraasyada iyo siinta qandaraasyada ciddii tartanka ku guulaysata.
2. Heshiisyada ku saabsan gadashada alaabta, qabashada shaqada iyo socodsiinta hawlaha la xiriira maamulka dawladda hoose ama mashaariicda, waxaa oggolaansheheeda leh guddiga fulinta degmada haddii aan xaddiga lacagtu ka badnayn 10,000 (toban kun) oo dollar ama shillin soomali u dhigma, wixii ka badan lacagtaas waxaa leh oggolaanshaheeda Golaha Deegaanka.
3. Qandaraasyada waa in toban (10) maalmood ka hor loo bandhigaa dadweynaha lana faafiyaa, iyadoo qandaraaska lagu dhejinayo meelaha dawladda hoose ugu tala gashay wargelinta iyo meelaha loo garto inay ku habboon yihiin.
4. Qandaraaska waxaa la siinayaa qofka ugu lacag yar ama ugu farsama fiican oo la hubo lacagta uu sheegtay inay tahay mid macquul ah, oo ku habboon hawsha la qabanayo.
5. Habka iyo hannaanka maamulka iibka iyo qandaraasyada Dawladaha Hoose waxaa loo raacayaa si waafaqsan habraacyada guud iyo tusmooyinka ku xusan Xeerka Iibka iyo Qandaraasyada Dawladda.

Qodobka 66-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Xeer-Dejinta

1. Golaha Deegaanka wuxuu soo saari karaa oo ansixin karaa xeerar uu ku nidaamiyo hawlaha xeerkani uu siinayo Dawladaha Hoose si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerkan.
2. Dhammaan xeerarka uu soo saaro Golaha Deegaanku waxaa loo gudbinayaa Wasaaradda iyo Garyaqaanka Guud, wuxuuna ku soo saarayaa Garyaqaanku Faafinta Rasmiga ah.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

3. Haddii Garyaqaanka guud uu garwaaqsado in xeerarka ay soo saareen Golaha Deegaanku uu ka hor imaanayo Dastuurka ama shuruucda kale ee Puntland wuxuu muddo soddon (30) casho gudahood ah dib ugu celinayaa golaha si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan.
4. Xeer-hoosaadyada ka soo baxa Golaha Deegaanka waa inay noqdaan kuwa aan baal marsanayn awoodaha uu xeerkani siinayo Dawladaha Hoose.

Qodobka 67-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose ee La Xiriira Heshiis Gelidda

1. Dawladaha Hoose waxay leeyihiin awood ay ku gasho heshiisyo la xiriira fulinta hawlaha ku xusan xeerkan.
2. Heshiisyada dawladda hoose ay dhinaca ka yihiin, waxaa saxiixaya duqa degmada isagoo uu goob-joog ka yahay Xoghayaha Dawladda Hoose, wuxuuna saarayaa shaabadda dawladda hoose, isagoo mas'uuI ka ah xafidaadda heshiisyada, diiwaan-gelinta iyo wixii la mid ah.
3. Heshiisyada la sameeyo iyadoo aan la dhowrin shuruudaha ku xusan faqrada 2-aad ee qodabkan, waa waxba kama jiraan.

Qodobka 68-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Ilaalinta Deegaanka

1. Dawladaha Hoose waxay gacan ka gaysanayaan ilaalinta deegaanka iyo ka hor-tagga nabaad guurka, xirmo daaqsimeedka gaarka loo leeyahay, jarista dhirta, laynta ugaarta, deegaamaysiyada/magaalaynta khatarta ku ah dhirta iyo daaqa.
2. Dawladaha Hoose waxay ka hor tagayaan wasakhaynta hawada, waxayna ka shaqaynayaan dhiraynta magaalooyinka iyo dayactirka dhulka waxyeelada deegaan ku dhacday.
3. Dawladaha Hoose waxay fuliyaan xeerarka ilaalinta deegaanka ee dawladda, waxayna soo saari karaan xeer-hoosaadyo ay ku maamulayaan deegaanka.

Qodobka 69-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose ee La Xiriira Ilaalinta Diinta iyo Dhaqanka Suubban

1. Dawladaha Hoose waxay mas'uul ka yihiin noolaynta Shacaa'irta Islaamiga ah, waxayna ka hor tagayaan wax kasta oo meel-ka-dhac ku ah ku dhaqanka Diinta Islaamka.
2. Dawladaha Hoose waxay mas'uuI ka yihiin isku-dubbaridka hawlaha aaska (Qubuuraha) iyo astaynta dhulka qabuuraha.

CARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

3. Dawladaha hoose waxay mas'uul ka yihiin abaabulista iyo qabashada xafladaha islaamiga ah sida iidaha.

Qodobka 70-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Horumarinta Xoolaha, Kalluumaysiga iyo Beeraha

1. Dawladaha Hoose waxay abuurayaan suuqyada iibka xoolaha iyo gawraca, waxayna ka hor tagayaan cudurada ku dhaca xoolaha, iyagoo gacan ka gaysanaya xaqiijinta caafimaadka iyo xannaanada xoolaha.
2. Dawladaha Hoose waxay abuurayaan suuqyada iibka qudaarta, waxayna dhiirigelinayaan maalgashiga beeraha.
3. Dawladaha Hoose waxay abuurayaan suuqyada kalluunka, waxayna gacan ka gaysanayaan dhiirigelinta kalluumaysatada iyo fulinta xeerarka la xiriira maamulka suuqyada kalluumaysiga ee Puntland.

Qodobka 71-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Horumarinta Suugaanta, Hiddaha/dhaqanka suubban iyo Ciyaaraha

1. Dawladaha Hoose waxay dhiirigelinayaan suugaanta, hiddaha/dhaqanka suubban iyo Ciyaaraha waxayna taageero dhaqaale iyo mid farsamo ku bixinayaan xoojinta suugaanta.
2. Dawladaha Hoose waxay abuurayaan kooxo si gaar ah ugu matala degmada tartamada suugaanta, hiddaha/dhaqanka iyo ciyaaraha.
3. Dawladaha Hoose waxay xaqiijinayaan dhismaha iyo qalabaynta maktabadaha wax akhriska ee dadweynaha.
4. Dawladaha Hoose waxay mas'uuI ka yihiin dhismaha, dayactirka iyo maamulka garoomada ciyaaraha.

Qodobka 72-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Horumarinta Ganacsiga

1. Dawladaha Hoose waxay dhisayaan suuqyada ganacsiga, waxayna u abuurayaan fursado ganacsi dadweynaha degmada.
2. Dawladaha Hoose waxay dhiirigelinayaan warshadaynta iyo maalgashiga degmada.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 73-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Canshuuraha iyo Ururinta Dakhliga

1. Dawladaha Hoose waxay ururinayaan canshuuraha heer degmo, waxayna abuurayaan ilo dhaqaale oo cusub.
2. Dawladaha Hoose waxay diyaarinayaan liis dhammaystiran oo qeexaya noocyada canshuuraha ee degmada, waxayna diyaariyaan xogta dakhliga la ururiyey.
3. Dawladaha Hoose waxay qiimaynayaan noocayada kala duwan ee canshuuraha sannad walba, waxayna soo rogayaan canshuuro waafaqsan xeerkan.

Qodobka 74-aad
Awoodaha Dawladaha Hoose Ee La Xiriira Dab-Damiska

1. Dawladaha Hoose waxay mas'uuI ka yihiin dab-damıska magaalada, waxayna xaqiijınayaan in degmadu leedahay agabka dab-damiska.
2. Dawladaha Hoose waxay ka hor-tageyaan in kaalimaha shidaalka laga dhiso agagaarka guryaha la deganyahay, faras-magaalaha ganacsiga iyo suuqyada ciriiriga ah.
3. Dawladaha Hoose waxay hubinayaan inay rugaha ka ganacsiga shidaalka ku rakiban yihiin qalabka lagu bakhtiiyo ama lagula dagaalamo dabka.
4. Dawladaha Hoose waxay ku soo rogayaan meheradaha, guryaha, huteelada iyo maqaaxiyaha cuntada inay haystaan qalabka dab-demiska laguna kormeero fulintooda.
5. Dawladaha Hoose waxay waajib kaga dhigayaan dhismayaasha nooc kasta oo ay yihiin ku tala-galka qalabka dab-damiska.

CUTUBKA 6-aad
XIRIIRKA U DHEXEEYA DAWLADDA IYO DAWLADAHA HOOSE

Qodobka 75-aad
Xiriirka Wasaaradda iyo Dawladaha Hoose

1. Wasaaraddu waxay isku xiraysaa Dawladaha Hoose iyo hay'adaha kale ee dawladda, waxayna xaqiijinaysaa sarraynta shuruucda, ka hortagga musuqmaasuqa iyo si xun ugu takrifalka awoodda.
2. Wasaaraddu waxay dib-u-habayn ku samaynaysaa siyaasadaha iyo xeerarka lagu maamulo Dawladaha Hoose, waxayna samaynaysaa waaxyo si gaar ah ugu xilsaaran horumarinta awoodda maamul iyo farsamo ee Dawladaha Hoose.
3. Wasaaraddu waxay dawladda dhexe mas'uul uga tahay ilaalinta danaha dawladaha hoose iyo xallinta khilaafaadka Golayaasha Deegaanka, isla

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

markkaana waxay kormeertaa xil-gudashada Golayaasha Deegaannada, Guddiyada Joogtada ah iyo kuwa Fulinta.

4. Wasaaraddu waxay xaqiijinaysaa hirgelinta doorashooyinka Dawladaha Hoose iyo daadejinta maamulka ilaa heer degmo, degsiimo iyo tuulo.
5. Wasaaraddu waxay kala xadaynaysaa soodimaha u dhexeeya degmooyinka, waxayna xallinaysaa khilaafaadka dhex mara degmooyinka ee la xiriira soohdimaha.
6. Wasaaraddu waxay xaqiijinaysaa in hay'adaha dakhligu cashuuraha ay u qabtaan degmooyinka, loogu wareejiyo akoonnada rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee degmooyinka.
7. Wasaaraddu waxay qiimaysaa awooodda Dawladaha Hoose, waxayna xoojinaysaa mac'hadka tababarka shaqaalaha Dawladaha Hoose.
8. Xoghayaha Ururka Dawladaha Hoose ee (ALGAPL) waxaa magacaabaya Wasiirka Wasaaradda.

Qodobka 76-aad
Kaalinta Wasaaradaha La Shaqeeya Dawladaha Hoose

1. lyadoon wax loo dhimayn awoodaha xeerkani siinayo Dawladaha Hoose, Wasaaradaha la shaqeeya Dawladaha Hoose waxay: -
   b. Xaqiijinayaan hirgelinta maamul daadejinta si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerkan.
   t. Dejiyaan siyaasadaha, shuruucda iyo halbeegyada hagaya hawlaha Dawladaha Hoose uu xeerkani siinayo.
   j. Waxay kormeer iyo korjoogtayn ku sameeyaan tayada iyo tirada adeegyada ay Dawladaha Hoose siiso dadweynaha.
   x. Waxay taageero farsamo u fidiyaan Dawladaha Hoose si loo kordhiyo awoodda wax qabad ee Dawladaha Hoose.
   kh. Waxay shaqaale u wareejiyaan maamulka Dawladaha Hoose markii ay ka codsadaan si loo xoojiyo awoodda wax qabad ee Dawladaha Hoose.
   d. Waxay xaqiijinayaan inay Dawladaha Hoose hesho dakhli ku filan oo ay ku fuliso hawlaha xeerkani siinayo.
   r. Waxay Wasaaradaha iyo hay'adaha dawladdu u wakiilan karaan Dawladaha Hoose inay u qabato hawlaha ay u-xil-saaran yihiin.

CUTUBKA 7-aad
XISAABAADKA, DABAGALKA IYO MIISAANIYADDA

Qodobka 77-aad
Habka Xisaabaadka

1. Maamulka Dawladaha Hoose waa inay ku dhaqmaan hab xisaabeed waafaqsan xeerka iyo nidaamka xisaabaadka dawladda Puntland.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

2. Maamulka Dawladaha Hoose waa inay 6-dii biloodba u soo gudbiyaan Isuduwaha Wasaaradda ee Gobolka xisaab-xir faahfaahsan.
3. Xisaab-xirka ku xusan faqrada 2-aad waxay nuqul ka siinayaan Xisaabiyaha iyo Hanti- dhawrka Guud ee Dawladda Puntland.

Qodobka 78-aad
Mas'uuliyadda Xisaabaadka

1. Qofka bixiya ama amra in la bixiyo kharash aan xeerka waafaqsanayn ama feejignaan la'aan darteed sabab u noqda maqnaansho hanti ay Dawladaha Hoose leeyihiin waxaa khasab ku ah in uu soo celiyo hantidii la bixiyey.
2. Mas'uuliyadda soo celinta hantida ku xusan faqrada 1-aad ee qodobkan waxay ku dhacaysaa qofka bixiyey ama mas'uul ka ah maqnaanshaheeda, haddii uusan amar qoran ka haysan mas'uuliyiinta ka saraysa ee awoodda xeerku u siinayo, markaas mas'uuliyadda soo celinta hantida waxay ku dhacaysaa qofkii amray bixinta hantida ku baxday sharci darada.
3. Xaaladaha aan ku xusnayn xeerkan, Dawladaha Hoose waxay ku dhaqmayaan xeerarka iyo habraaca xisaabaadka dawladda.
4. Soo celinta ku xusan qodobkan, waxay Wasaaraddu amraysaa in dib loo soo cesho hantidaas wakhti cayiman.
5. Haddii amarka Wasaaradda loo hoggaansami waayo, waxay dacwad u gudbinaysaa hay'adaha caddaaladda ee ay khusayso.

Qodobka 79aad
Dabagalka iyo Baarista Xisaabaadka

1. Hanti-dhawraha Guud wuxuu baaris ku samaynayaa dhammaan akoonnada iyo xisaabaadka Dawladaha Hoose, si waafaqsan Dastuurka Dawladda Puntland.
2. Hanti-dhawrku wuxuu samayn karaa baaritaano lama filaan ah iyo baaritaan kasta oo loo baahdo.
3. Hanti-Dhawrku wuxuu warbixintiisa la wadaagayaa.
   b. Golaha Wakiillada.
   t. Wasaaradda.
   j. Golaha Deegaanka ay khusayso.
4. Dawladaha Hoose waxay yeelanayaan qayb u gaar ah dabagalka xisaabaadka oo u-xil-saaran dabagalka iyo hubinta xisaabaadka degmada, ka hor-tagga xatooyada, diyaarinta habraacyada xisaabaadka iyo diyaarinta warbixinnada dabagalka.
5. Qaybta dabagalka ee ku xusan faqrada 4-aad ee qodobkan waxay warbixinnada baaritaanadooda la wadaagayaan Golaha Deegaanka, waxayna nuqul ka siinayaan Wasaaradda iyo Xafiiska Hanti-dhawrka Guud.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

6. Xubnaha qaybta Hanti-dhawrka gudaha ee Dawladaha Hoose ee ku xusan faqrada 4-aad ee qodobkan waxaa soo magacaabaya guddoomiyaha waxaana ansixinaya golaha, waxayna maamul ahaan hoos tegayaan duqa degmada.

Qodobka 80-aad
Miisaaniyadda

1. Miisaaniyadda ku talagalka ah ee Dawladaha Hoose iyo hay'adaha hoos yimaada waxay ka mid tahay Miisaaniyadda guud ee Dawladda, waxayna saldhig dhaqaale u tahay Dawladaha Hoose.
2. Sannad kasta maamulka Dawladaha Hoose wuxuu diyaarinayaa Miisaaniyad ku talogalka sannadka soo socda, iyadoo la raacayo habka iyo tilmaamaha Wasaaradda Maaliyadu ay ka bixiso arrintaas. Miisaaniyaddaas waxay ka kooban tahay: -
   b. Qiyaasta dakhliga iyo kharashka ee sannadka soo socda.
   t. Qoraal faah-faahinaya Miisaaniyadda xisaab xirka 6-dii bilood ee la soo dhaafay si looga cabir-qaato.
3. Miiisaaniyadda ku talagalka ah waxaa la hor-dhigayaa oo oggolaanaya Golaha Deegaanka ee Degmada, waxaana loo gudbinayaa isuduwaha Dawladaha Hoose ee Wasaaradda ugu dambayn soddonka (30) ka bisha September.
4. Isuduwaha Dawladaha Hoose ee Wasaaraddu wuxuu ku lifaaqayaa hadal qoraalka ku saabsan Miisaaniyadda, ka dibna waxuu u soo gudbinayaa Wasaaradda ugu dambayn 2 bisha October, si ay ugu gudbiso Wasaaradda Maaliyadda looguna daro Miisaaniyadda guud ee Dowladda ee laga ansixinayo Golaha Wakiillada.
5. Haddii ay u muuqato maamulka Dawladaha Hoose in uu soo saari karo 6 biloodka dambe ee sannadka dakhli dheeraad ah, waxaa loo oggol yahay in uu soo sameeyo Miisaaniyad ku celis ah wuxuuna u gudbinayaa wasaaradda, si ay ugu gudbiso Wasaaradda Maaliyadda loogana ansixinayo Golaha Wakiillada.
6. Haddii baahiyi timaaddo waxaa 6-biloodka dambe Golaha Deegaanka ee degmadu guddoomin karaa wareejin lacageed, taas oo awoodeeda oggolaansho loo kala leeyahay sidan soo socota: -
   b. Kala wareejinta dhex Marta labada madax-xige oo isku madax ah waxaa lagu ansixinayaa oggolaanshaha Golaha Deegaanka.
   t. Kala wareejinta dhex Marta labada madax-xige oo kala madax ah waxaa lagu ansixinayaa oggolaanshaha Golaha Deegaanka.
7. Dawladaha Hoose waa in ay sannad kasta samaysaa xisaab-xir 3-bilood ah, mid 6-bilood ah iyo mid sannadeed oo uu guddoonkeeda leeyahay duqa

degmadu, waana in loo gudbiyaa guddiga joogtada ah ee Golaha Deegaanka oo u sii gudbinaya isuduwaha Dawladaha Hoose si uu ugu gudbiyo Wasaaradda.

Qodobka 81-aad
Kormeerka iyo Baarista Miisaaniyadda

1. Wasaaradda iyo hay'adaha kale oo xeerku u oggol yahay waxay ku leeyihiin kormeer iyo baaris Miisaaniyadda dawladaha Hoose iyo Xisaabaadkooda.
2. Haddii ay hay'ado kale sameeyeen kormeerka iyo baarista waxaa waajib ah in ay si degdeg ah ugu soo gudbiyaan Wasaaradda warbixin tifaftiran iyagoo dhawraya wakhtiga iyo habka uu tilmaamayo habraaca xisaabaadka dawladdu.

CUTUBKA 8-aad
ILAHA DAKHLIGA IYO KHARASHKA

Qodobka 82-aad
Canshuuraha

1. Dawladaha hoose waxay qaadayaan Canshuuraha ay u jideeyaan Xeerarka canshuuraha Puntland.
2. Golaha Deegaanka degmada ayaa xeer-nidaamiye ku soo saaraya sicirka laga qaadayo mid kasta oo ka mid ah madaxyada canshuuraha ku xusan faqrada 1-aad ee qodobkan.
3. Awoodda jaangoynta iyo qiime u samaynta canshuuraha dawladaha hoose waxa goluhu u go'aaminayaa si waafaqsan habraacyada Wasaaradda Maaliyadda Dawladda Puntland.
4. Ka hor intaan Golaha Deegaanka soo saarin xeer-nidaamiyaha wax-ka-bedelka canshuuraha uu qodobkan siinayo Dawladaha Hoose, waxay ogaysiin siinayaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha, si ay u qiimayso, talana uga bixiso wax-ka-bedelka canshuuraha ee degmada ay khusayso.

Qodobka 83-aad
Macaashka Ganacsiga iyo Kirooyinka

1. Dawladda Hoose waxay samayn kartaa ganacsi iyo kiraynta dhismayaasha iyo dhulka Dawladda Hoose haddii dakhli ka soo gelayo.
2. Heshiisyada, habka maaraynta ganacsiga iyo kirooyinka ku xusan faqrada 1-aad waxaa laga ansixinayaa Golaha Deegaanka.
3. Heshiisyada kirada ee Dawladda Hoose gelayso waa in loo maareeyaa hab waafaqsan xeerka iibka iyo qandaraas bixinta Puntland.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 84-aad
Amaahda

1. Goluhu awood uma laha inuu galo kharash ka baxsan Miisaaniyadda oo sababa deyn lagu yeesho golaha.
2. Masuuliyiinta saxiixa kharashka u idman ee galay kharash ka baxsan Miisaaniyadda iyaga ayaa mas'uuI ka ah deynta ay galeen loona raacayaa.
3. Waxaa guddiga fulinta iyo mas'uuliyiinta maamulka ka reebban inay dadweynaha, hay'adaha dawladda, shirkadaha IWM, ka galaan deyn aaney lacagteedu Miisaaniyadda ku jirin.
4. Haddii ay timaado duruufo degdeg ah sida aafooyinka dabiiciga ah ama arrimo nabadgelyo oo u baahan dhaqaale, Miisaaniyaddana aan ugu jirin, Guddiga Fulinta waxaa u furan in uu qaato go'aan uu ku qaato amaah lacageed uu ku daboolo baahidaas isagoo la kaashanaya Wasaaradda.
5. Amaahda ku xusan farqada 4-aad ee qodobkan waa in goluhu ku soo celiyaa muddo aan ka badnayn laba (2) sannadood.

Qodobka 85-aad
Deeqaha iyo Kabista Dhaqaale ee Dowladda Dhexe

1. Dowladda Hoose waxay ka helaysaa dawladda dhexe taageero lacageed oo kala ah:
   b. Taageero lacageed oo dawladdu ku shubto Dawladaha Hoose si ay ugu fuliyaan mashaariic cayiman, una kharash gareeyaan hab waafaqsan shuruudihii lagu siiyey.
   t. Taageero lacageed oo dawladdu u siiso Dawladaha Hoose si ay uga fuliso maamul daadajinta iyo gaarsiinta adeegyada loo baahan yahay heer degmo iyo xaafad.
   j. Taageero lacageed oo dawladdu u mariso Dawladaha Hoose si loogu horumariyo degmooyinka qaar ee horumarkooda gaabiska yahay si ay u soo gaaraan degmooyinka kale ee horumarsan.
2. Dawladdu waxay si toos ah ugu shubaysaa (xawilaysaa) lacagaha taageerada ah ee ku xusan faqrada 1-aad xarfaha (b, t iyo j), akoonnada Dawladaha Hoose, waxaana lagu maamulayaa si waafaqsan xeerarka maaliyadda dawladda Puntland.

Qodobka 86-aad
Ururinta Dakhliga

1. Dakhliga Dawladaha Hoose waxaa lagu ururinayaa Shilin Soomaali ama Lacag Qalaad oo u dhiganta.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

2. Lacagaha qalaad ee u soo xerooda Dawladaha Hoose waxaa loo bedelayaa Shillin Soomaali, waxaana lagu salaynayaa sicirka markaas uu marayo.
3. Lacag kasta oo la qabto waa in lagu bixiyaa rasiid (warqadda lacag qabashada loogu talagalay).

Qodobka 87-aad
Kharashka

1. Dawladaha Hoose waxay bixin karaan kharashka loogu oggolaaday Miisaaniyadda oo noqon kara: -
   b. Kharash loogu talagalay xuquuqda shaqaalaha iyo hawl socodsiinta caadiga ah oo u taagan 60%.
   t. Kharash hirgelinta mashaariicda horumarinta bulshada ee deegaanka 30%.
   j. lyo kayd 10%.
2. Haddii Dawladaha Hoose aanay u fulin karin kharashka habka ku xusan faqrada 1-aad duruufo jira awgeed, waxay qoraal u dirayaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha si ay u hubiso inay jiraan duruufo macquula oo keeni kara in laga bayro habka qoondada kharash ee ku xusan faqrada 1- aad.
3. Kharash kasta oo la bixinayo waa in loo sameeyaa xaashida lacag bixinta oo loogu talagalay inay ku lifaaqan yihiin dukumeenti caddaynaya kharashkaas, waana in ay saxiixaan dadka sharciga u leh saxiixa iyo qofka lacagta qaadanaya waana in ay waafaqsanaataa shuruucda iyo xeerarka xisaabaadka dawladda Puntland.

CUTUBKA 9-aad
DEMBIYADA IYO RACFAANKA

Qodobka 88-aad
Ciqaabaha

1. Cid kasta oo jebisa qodob ama qodobo ka mid ah xeerkan, diidda ama is hor-taagta fulintiisa waxay mutaysanaysaa ganaax lacageed oo u dhexeeya boqol doolar ($100) ilaa ($250) laba boqol iyo konton dollar ama shillin soomali u dhigma.
2. Fal-dembiyeedyada ku xusan faqrada 1-aad ee qodobkan, waxaa loo gudbinayaa hay'adaha sharciga ee ku shaqada leh, waxaana loo cuskanayaa Xeerka Ciqaabta Guud.

Qodobka 89-aad
Racfaanka

1. Qof kasta oo cabasho ka qaba go'aamada ka soo baxa Dawladaha Hoose wuxuu xaq u leeyahay inuu racfaan uga qaato maxkamadda awoodda u leh.
2. Racfaan ka qaadashada go'aamada Dawladaha Hoose ee ku xusan faqrada 1-aad waxaa loo marayaa si waafaqsan habraacyda dacwadaha maamulka ee u degsan garsoorka.

CUTUBKA 10-aad
QODOBO GUUD

Qodobka 90-aad
Maaraynta hantida

1. Hantida Dawladda Hoose waa hanti dawladeed waxaana loo isticmaali karaa dan-guud oo keliya.
2. Dawladda Hoose waxay dejinaysaa hannaan lagu maamulo hantida iyo agabka markaas aan loo baahnayn si waafaqsan xeerka.
3. Habka Dawladda Hoose u wareejinayso hantida waxaa go'aaminaya Golaha Deegaanka oo kala dooranaya xaraashidda, qubidda ama duugista hantida haddii aan isticmaal dambe u harin.

Qodobka 91-aad
Soo Saarista Xeer Nidaamiyeyaal

1. Wasiirku wuxuu soo saari karaa isagoo la tashanaya degmooyinka xeer nidaameyeyaal lagu fulinayo xeerkan oo la xiriira: -
   b. Arrin kasta oo uu xeerkan oggolaaday in xeer-nidaamiye loo sameeyo.
   t. Hirgelinta iyo fulinta hawlaha ku xusan xeerkan.
   j. Wixii kale ee lagama maarmaan ah ama ah hab la dejiyo si loogu guuleysto ama sare loogu qaado ujeeddooyinka xeerkan.

Qodobka 92-aad
Burin

1. Waxaa la buriyey wixii xeer ama qawaaniin kale ah oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin xeerkan.
2. Wixii laga waayo xeerkan waxaa loogu noqonayaa xeerarka kale oo aan ka hor- imaanayn Dastuurka Dawladda Puntland.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 93-aad
Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.